# Hawlgalka Socdaalka isku-dhafa n ee Soomaaliya

# Socdaalka isku-dhafan ee sii mara Soomaaliya, kana gudbaya Gacanka Cad-meed



**April 2008**

## ***DULMAR KOOBAN***

Kumanaaa qaxooti ah ayaa sannadwalba la kulma socdaallo dihbaato badan leh oo ay kaga tahriibayaan dalalkooda, kuwaas oo sii maraya gobolka waqooyi-bari Soomaaliya ee Puntland iyo meelo ka sii shisheeya iyagoo ka gudbaya Gacanka Cad-meed. Waxa jira dareenno kala duwan oo dhaqdhaqaaqyadan la xiriira oo ay ka mid yihiin; iyagoo ka cararaya ciqaab iyo xad-gudubyada dhinaca bini'aadmiga iyo sidoo kale go'aanno la xiriira fursado dhaqaale oo wanaagsan sidii ay ku heli lahayeen, kaas oo u horseedaya masahaakilaadka "isku-dhafan" ee la kulmayaan. Qaar badan ayaa dhinta inta ay safarka ku jiraan, halka qaar kalena ay xad gudubyo iyo dhaawcba kala kulmaan is-xambaarayaasha aan ixtiraamka lahayn. Inkastoo tiro aad u badan oo ka mid ah dadka tahriibka ah ay halista ay ka dhaxlaan socdaalka ay si aad ah u sii kordhayso marka ay isku dayayaan inay kaga gudbaan min Puntland ilaa Yemen. Waxaa warbixintu sheegtay in sannadkii 2006-dii, dad gaaraya 22,000 qof ay u gudbeen dalka Yemen. Halka sannadkii 2007-dii ay tirada hay'adda UNHCR ee Yemen muujisay qiyaas ahaan 29,000 qof inay isku dayeen inay ka gudbaan, iyadoo in ka badan kun qof ay dhinteen. Ilaa sannadkan 2008, waxaa lagu qiyaasayaa tiro gaaraysa laban-laab ahaan. Waxayna wadajir ahaan u aqoonsadeen beesha caalamka iyo maamul goboleedka Soomaaliyeedba inay jiraan caqabado waaweyn oo sii kordhinaya xaaladaahaas iyaga ah ere ka jira gobolka, iyadoo xitaa aan weli la xaqiijin sabaha dhinaca bini'aadminnimada iyo dhaqaalaha, taasoo ay lagama maarmaan tahay in la soo bandhigo saamayta ay yeelan karaan.

### ***Hawlgalka socdaa;lka Isku-dhafan ee Soomaaliya***

Waxaa horraantii 2007-dii, la asaasay hawlgalka socdaalka isku-dhafan, kaas oo hoos-taga Guddiga Joogtada ah ee ay ay hay'aduhu wadaagaan ee badbaadada kooxaynta( (“IASC”), kaas oo loo bixiyey *kooxda hawlgalka socdaalka isku-dhafan* (“MMTF”) iyadoo shir-guddoonka ku meel gaar ah loo igmaday markaas oo ay si ku meel gaar ah ahaan u nshr-guddoominayeen UNHCR iyo IOM. Waxaana xubnaha (MMTF) ka mid ahaa, OCHA, UNDP, UNICEF, OHCHR, DRC (Danish Refugee Council), iyo NRC (Norwegian Refugee Council)**.** Wuxuuna hadafkka(MMTF) uu ahaa in diiradda la saaro istraatiijiyada dhawrista xuqquuqda iyo gurmadka bini'aadminnimada eek u wejahan tahriibayaasha iyo dadka magan-gelyo doonka ah ee ku ha-ka-naya Soomaaliya. Waxaana la aqoonsaday marka la taabbagageliyo nidaamka isku-duwidda iyo gurmadka loo baahan yahay, waa in la soo jeediyaa qorshe-hawleed wax ku ool ah oo heer gonol ah, kaas oo yeelan doona wejiyo kala duwan oo lagu xakamaynayo caqabadaha imminka jira. Waxaana dhammaan natiijooyinka kooxda(MMTF) dusha kala socon doona Guddiga joogtada ah ee hay'adaha kala duwan ee badbaadada kooxaynta(IASC), iyagoo wada tashi joogto ahna la yeelan doona kooxda heer waddan ee QM Soomaaliya (UNCT).

Waxaana warbixinta istraatiijiyadan laga soo min-guuriyey daraasad la dhammaystiray January 2008, taasoo ay si gaar u meel-marisay kooxda hawlgalka socdaalka isku-dhafan ee Soomaaliya (eeg santuukha), si loo faahmo xaaladda qalafsan ee tahriibka sii maraya Soomaaliya ee u gudbaya Yemen. Waxayna warbixintu tibaaxday dhibaatada iyo caqabadaha ay kala kulmaan toobiyha ay sii marayaan, iyagoo ku kulma Puntland, islamarkaana dhibaatooyin fool xun la kulma inta ay badaha ku sii gooshayaan ilaa Yemen iyo inta ay dadka Yemen lagu soo dhawaynayoba. Waxaana toobiyayaasha kale ka mid ah: kan loo sii maro jabuuti, kaas oo celcelis kooban lagu sameeyey, wallow mudnaanta koowaad la siinayey dhaqdhaqaaya inta u dhaxaysa magaalada dekedda ah ee Bossaso, Puntland, iyo Yemen, halkaas oo ahayd xuduntii uu tahriibku ka bilowday.



**Muuqaalka 1: Tahriibayaal doonyo ka raacaya meel ku dhaw Bossaso**

Waxay warbixintu soo bandhigtay istraatiijiyada talo-soo-jeedinta ee ku wejahan caqabacadahan iyaga ah. Kuwaas oo lagu salaynayo raadadka dhinacyada isku-duwidda, jaan-goynta siyaasadda iyo daraasadaha heer gobol iyo sidoo kale gurmadka laga heli karo gudaha Soomaaliya. Waxana la soo jeediyey in la ballaariyo hawlgallada bini'aadminnimda si markaas loo soo bandhigo xaddidnaanta badbaadada tahriibayaasha iyo qaxootiga dhinaca xuqquuqul insaanka ee imminka jirta ee ay ka mid yihiin; awoodaynta xirfadaha heer qaran iyo heer maamul goboleedba, iyadoo lasoo jeedinayo sababaha dhaqaale ee dhaliyey dhacdadan iyada ah.

Dhammaan sawirrada Dukumentigan waxaa qaaday A. Fazzina, December 2007

**WAAXDA I: Tahriibka baaxadda leh ee sii maraya Soomaaliya**

## 1. Gogol-dhig

Socdaalka dadka gudaha Soomaaliya iyo kuwa ka tegaya Geska afrika ma ahan dhacdo cusub. Guur-guuritaanka xilliyeed ee dadka xoolo-dhaqatada ah ee Soomaaliya, Kenya iyo Ethiopia, ayaa si xad dhaaf ah uga gudbayey xuduudaha ay wadaagaan, iyadoo muddo aad u fog ay u dhexeeyeen dhaqdhaqaaqyada ganacsiyeed oo isaga xuduudaha heer gobo. Dhaqdhaqaaqyada tahriibka shaqalaha Soomaalida iyo ardayda waxbarashada u raadsan jirya waddamada Fransiiska,Talyaanida iyo Ingriiska ayaa bilowday xilligii gumaysiga, kuwaas oo ay dhismeen jaaliyadihii ugu horreeyey ee Soomaalida dibadda ku nool, iyadoo ay si weyn u soo jiiteen balaarintii shidaalka ee jasiiradda Carabta sannadihii 1970-yadii iyo 1980-yadii, kuwaas oo tiro aad u badan u shaqo u raadsadeen. Waxaana lagu qiyaasay sannadkii 1987kii, ilaa 375,000 shaqaale xirfad leh oo Soomaaliyeed inay shaqooyiin ka heleen waddamada Khaliijka.[1]

Kaddib burburkii dawladdii Soomaaliyeed iyo dagaalladii sokeeyey ee ka dambeeyey, ayaa horseeday dhibaatooyin dhaqaale, taas oo sababtay in tiro aad u badan oo Somali ah ay ku-bara-kacaan gobolka iyo dibaddaba. Waxaa lagu qiyaasay dagaalladii 1992kii iyo abaarihiiba inay ku dhinteen ilaa 280,000 qof oo Soomaali ah,iyadoo in ka badan hal milyan oo qofna lagu khasbay inay guryahooda ka cararaan. Qoysas badan badan oo xiriir iyo dhaqaale haystay ayaa u dhoofay Yurub,Maraykanka, Australia, iyo Canada; halka qoyssa fara badan oo sabool ahaa ay galeen waddamada deriska ah sida; Ethiopia (180,900), Kenya (141,100), iyo Yemen (55,200),ama ku bara-kacay gudaha dalka Soomaaliya oo ay ku sugan yihiin.

Kaddib markii ay dib-uga soo-bexeen Ciidammadii hawlgalka nabadgelyada Soomaaliya (UNOSOM) sannadkii 1995, waxaa bilowday iska-horimaadyadii siyaasadeed, dagaalladii qabaa'ilka iyo dhibaatooyin dhaqaale-darri xad-dhaaf ah oo sii kordhiyey bara-kac hor leh gudaha iyo dibaddaba ah oo Soomaalida saameeyey. Abaarihii ka dhacay bartamaha iyo koofurta Soomaaliya bilihii July iyo August 2006, ayaa weheliyey daadadkii ku fatahmay isla sannadkaas dhulka webiyada u dhexeeya. Waxay QM ku qiyaastay 400,000 qof inay dhammaadkii 2006kii ka barakeceen magaalooyinka ay Muqdishu ka mid tahay, kuwaas oo heerka noloshoodu aad u liitay. Bishii Disember 2006kii, waxay ciidammada Ethiopia oo taageeraya Dawladda Federaalka ku-meel-gaarka ah ay dagaal ku qaadeen Midowgii maxaakimta islaamiga ahaa. Dagaalladii u dhexeeyey kooxaha mucaaradka ah iyo gurmadka ciidammada DFKMG ah oo kaashanaysa Ethiopian-ka ee ka soconayey Muqdishu 2007-kii, ayaa waxaa isku-biirsaday xad-gudubyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha iyo sharciga bini'aadmiga,kuwaas oo horseeday bara-kac lixaad leh oo dadka rayidka ah ee Muqdishu saameeyey, laguna qiyaasay ilaa 700,000 qof, kaas oo si weyn ugu baahay qaybo kale oo Soomaaliya ah dhamaadkii 2007.

Waxaa si weyn u kordhayey dhaqdhaqaaqa dadka reer Ethiopia ee waddammada dibadda ee ka baxsan Geeska Afrika u dhoofayey ilaa wixii ka dambeeyey kacaankii 1974kii. Qaxooti aad u fara badan ayaa soo galay Soomaaliya 1977 kaddib markii uu dhacay dagaalkii gobolka dadka

[1] Joakim Gundel, Daraasadda Horumarinta Socdaalka ee Soomaaliya,2002*( Migration-Development Nexus)*

Soomaalida Ethiopia. Dhacdadaas oo sii socotay ilaa bartamihii 1990-yadii,kuwaas oo ku biiray qaybaha kale ee gobollada kale ee Ethiopia..

## 2. Toobiyaasha waaweyn ee tahriibka ka baxa Geeska Afrika ilaa Yemen

Waxaa ka mid ah toobiyayaasha waaweyn ee tahriibka min Geeska Afrika ilaa Yemen safarka badda ee ka bilowday goobaha ku xeeran magaalada dekadda ah ee Bossaso (Puntland) iyo Obokh (Djibouti), iyadoo mararka qaarkoodna loo isticmaalo ku-ha-kasho Berbera (Somaliland, ama Waqooyi-galbeed Soomaaliya, )ilaa dhawr goobood oo ku teedsan xeebaha Yemen. Waxayna u badan yihiin dadka isku-dayaya inay ka tahriibaan seddexdan goobood: Gobollada Oromo iyo Tigrinya ee Ethiopia; Maamul-goboleedka heer qaran ee Soomaalida Ethiopia; iyo Bartamaha iyo Koofurta soomaaliya. Goob kasta oo ay dadkaasi ka soo jeedaan, waxaa ahmiyad gaar ah u leh toobiyaal ku wejahan magaalooyinka dekedaha leh ee ay danaynayaan inay tahriibkooda uga sii gudbayaan dalka Yemen.

UNHCR
The UN Refugee Agency

# Horn of Africa: Smuggling Routes to Yemen

March 2008

UNHCR Somalia
Nairobi, Kenya
Email : marinos@unhcr.org




The boundaries and names shown and the designations used on this map do not imply official endorsement or acceptance by the United Nations.

Sources: UNHCR, Global Insight digital mapping - © 1998 Europa Technologies Ltd.

## 2.1 Toobiye1: Ethiopia – Somaliland – Puntland – Yemen

Waxaa toobiyahan inta badan isticmaala Ethiopian-ka ka yimaada dhulka jooggiisu sarreeyo iyo sidoo kale, qiyaas ka mid ah ethioipian-ka ka soo jeeda qaybta waqooyi ee dhulka jooggiisu hooseeyo. Waxay tahriibayaasha iyo qoxootigu isticmaalaan shabakad ay si hufan u agaasimaan dadka is-xambaarka sharci- darrida ah, kuwaas oo ka soo dhoofiya min xarumohooda Ethioipia ku yaalla, iyagoo ka soo gudbinaya xadka ay la wadaagaan Somaliland iyo dhulka ka baxsan ee dhinaca Bossaso. Waxana ka mid ah toobiyaha goobaha ku-ha-ka-shada, gaar ahaan Hargeisa iyo Bura'o, halaaks oo qaar ka mid ah dadkaasi ay shaqooyin ku meel gaar ah ka raadsadaan muddo toddobaadyo ah ama bilo sidii ay uga heli lahaayeen dhaqale ay ku sii tahriibaan marxaladda xigta. Marka ay tahriibayaasha iyo qaxootiguba gaaraan Bossaso, waxay door-bidaan inay degaan ka helaan goobaha dekedda ku dhaw,halkaas oo ay maqaado shaah oo badan ku yaalliin, waxaana mid kasta iska leh dad ay isku deegaan ka yimaadeen. Milkiilayaasha maqaayadaha shaaha,ayaa ah mukhalasiin ka caawiya inay helaan tahriibayaashu doonyo ay ku tagaan dalka Yemen.

## 2.2 Toobiye 2: Soomaalida gobolka is-maamulka Ethiopia – Puntland – Yemen

Dadka Ethiopian-ka ah ee ka soo jeeda dhul-hoosaadka,labadaradle, dadka qabiilka Ogaadeeenka ah, ayaa u muuqda inay door-bidaan inay u socdaalaan goobaha ay filayaan inay badbaado ka helayaan ee dadka ay isku haybta wadaagaan (Darod). Wallow qaarkood ay si toos ah u sii maraan Somaliland si ay ugu biiraan toobiyaha 1aad, kuwa kalena waxay soo maraan min Wardheer, iyagoo sii mara toobiyaha xadka Puntland ee u (dhexeeya Garowe iyo Galkayo) dabadeena u sii safra jidka Garowe ilaa Bossaso. Qoysaska ka yimaadaada dhul-hoosaadka koofureed ee eek u dhaw Godeyayaa waxay ka gudbaangobollada Hiiran iyo Galgaduud ee Soomaaliya kaddibna waxay u siigudbaan dhinaca Galkayo. Toobiyahani waa mid aad khatar u ah,maadaama uu sii dhexmaro gudaha Soomaaliya ee ay degan yihiin qabiillo kala duwan oo hawiye ah, kuwaas oo dagaallo joogto ah ay ka dhexs-dhacaan, ayna xoog ku leeyihiin joogitaanka ciidammada Ethiopian-ka ah,halkaas oo ay ku badan yihiin jid-gooyiinka baraha koontroollda aan sharci ahayn iyo kuwo sharci ahba ee gudaha Soomaaliya. Tahriibayaasha iyo qoxootiga isticmaalaya toobiyahan kuma tiirsana shabakadaha caan baxay ee is-xambaarayaasha sharci-darrida ah ku shaqaysta.marka ay Bossaso gaaraanna, waxay la joogaan dad qaraabo ah ama goobaha dadka bara-kacay ee dhirta, Balade, Tawakal, Absame iyo Abow ee agagaarka Bossaso.

## 2.3 Toobiye 3: Koofurta-BartamahaSoomaaliya – Puntland – Yemen

Waxaa inta badan laga yaabaa in laga bilaabo gobolkasta oo ka mid ah Koofurta-bartamaha Soomaaliya oo uu ku yaallo toobiyaha ugu muhiimsan ee isku xidha gobolka Hiiraan, kaasoo caqabado adag ay hor yaalliin waddada muhiimka ah eesii marta waddada Galgaduud, Galkayo, Garowe iyo Bossaso. Taas oo ah hal-bowlaha uhgu muhiimsan ee gaadiidka Soomaaliya, waxaasi joogto ah toobiyahan adeegsada Tagsiyo,gawaari waaweyn iyo Basasba, kuwaas oo ay raacaan dadka bara-kacay, waxayna isugu jiraan gaadiid si gaar ah loo kiraysto ama raaca kuwa xamuulka ah. Waxaana warbixintu sheegaysaa in sannadkii 2007-dii ay ka jireen Gobollada koofurta- bartmaha Soomaaliyain ka badan 300 jid-gooyo, iyagoo lacag weyduiisanayey dadka rakaabka ah si ay u badbaadiyaan, islamarkaana waxaa la diiwaan-

geliyey dhac iyo xad-gudubyo kufsi iyo fara-xumayn loo gaystay rakaabkaas, wuxuuna toobiyahani uu noqday mid ay khatartiisu sii kordhayso. Dadka is-xambaarka ah ee awoodda ku leh Bossaso, ayaa mararka qaarkood waxay diyaariyaan safarro tahriibayaasha iyo qaxootigu ay ku tagaan Bossaso.

**2.4 Toobiye 4: Ethiopia – (Somaliland) – Djibouti – Yemen**

Marka loo gudbayo dalka Yemen iyadoo la si marayo jabuuti, mid ahaan waxaa la mari karaa Somaliland oo dhinacyada dhulka iyo badda ee goobo ku dhaw Berbera, ama si toos ah waddada ka timaadda Ethiopia, taas oo ah toobiyaha ugu muhiimsan ee tahriibayaasha iyo qaxootiga qaybaha bari ee Ethiopia. Waxaa dhawaan sii kordhaya tirade Soomaalida iyaguna toobiyahan isticmaalaya, iyadoo xitaa masaafadu ay aad uga ballaaran tahay tan loo sii maro Bossaso, waxaana ka furan, madaama ay sii kordhayaan wacyi-gelinta halista ay la kulmayaan dadka ka gudbaya dhinaca Bossaso. Toobiyaha Jabuuti, ayaa noqday mid can baxay, kaddib markii si is-danbba-joog ah labada Bam loogu qarxiyey qoxootigii Ethiopian-ka ahaa ee Bossaso horraantii February 2008.marka ay qaxootigu gaadhaan Jabuuti, waxay goob ku-ha-kasho u isticmaalaan magaalada Arhibe, halkaas oo ay sii joogaan in ka badan seddex bilood si ay uga shaqaystaan dhaqaale ay daboolaan lugta xigta ee safarkooda ay ug sii gudbayaan ilaa Yemen.

Bishii March ee 2008-da,waxaa maamulka Somaliland ay ku xireen Borama, koox Ethiopian iyo Soomaali ah oo ka yimid Koofurta-bartamaha Soomaaliya. Waraysi ay hay'adda UNHCR la yeelatay ayaa muujiyey in Soomaalidu ay dekedda Berbera ay u isticmaali jireen goob ay uga sii gudbaan Yemen, iyagoo xusay inay ku adkaatay sidii ay uga gudbi lahayeen xadka Jabuuti. Khadkan ayaa waxaa uu u muuqdaa toobiye muhiim ah oo cusub oo u baahan in daraasad iyo la socosho dheeraad ah lagu sameeyo mustaqbalka.

## 3. Raad-raaca Tahriibka iyo Qaxootiga Bossaso iyo Sababaha safakooda

### 3.1Raad-raaca Tahriibka isku-dhafan ee Bossaso

Sida ka muuqata raad-raaca dadka ku hawllan ‘tahriibka isku-dhafan’ ee sii mara Bossaso, wuxuu diiradda saarayaa sababaha kala duwana ee uga soo dhoofeen deegaankooda,hadakooda ku wejahan goobaha gaarka ah ee ay bartil-maameed-sanayaan kaas oo (laga yaabo in toobiyaha la beddelo) kaas oo is-beddel ku samayn kara xaaladda dhinaca sharciga. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan waxay isticmaalaan nidaam aan sharci ahayn iyo kaabayaasha gaadiidka, kuwaas oo dhibaatooyin kala duwan ay dadku kala kulmaan.

Waxaa kooxda ugu muhiiimsan loo yaqaan qaybta tahriibka isku-dhafan ee sii mara Bossaso waxaana ka mid ah, Ethiopian-ka ka yimaada dhulalka joogga sare iyo hoose, iyadoo Soomaliduna ya u badan yihiin Bartamaha iyo koofurta soomaaliya, iyadoo ay jiraan tiro yar oo ah Kenyans, Ugandans, Tanzanians iyo Sudanese.

Way adagtahay in la xaqiijiyo tirada dhabta ah ee sugaya inay u gudbaan, mana yara, maxaa yeelay dadka Soomaalida ah ee gudaha ku-bara-kacay oo qudha ayaa lagu qiyaasaa ilaa 30,000 qof, kuwaas oo la nool qoysaska marti-geliyey ee Bossaso, waxayna wada deggen yihiin xaafadaha isku-raranta ah ee dadka qoxootiga ahi deggen yihiin. Lama kala saari karo farqiga u dhexeeya dadka bara-kacay iyo qoxootiga Soomaalida ah. Qaar badan oo ka mid ah dadka ku-bara-kacay. Xitaa dadkii aan markii hore aan doonayn inay u gudbaan Yemen,ayaa qayb ka noqon kara dadkaas haddii ay fursad helaan. Sida lagu xusay daraasadda deg-degta ah ee goobaha tahriibka qaxootiga ee Bossaso iyo xogta muhiimka ah ee dadkaas laga helay, waxay kooxda hawlgalka(MMTF) ku qiyaastay in tahriibayaasha rasmiga ah ee Soomaalidu ay waqti kasta oo loo eego ay sare u dhaafayaan ilaa 9,000 qof.

Qoxootiga Ethioipian-ka ah ee tahriibaya, ayaa waxay u badan yihiin dad da' yar, lab aan weli guursan, wallow ay qaarkood qoyas yihiin, sida hooyooyin carruur la socdaan, haween waayeel ah iyo carruur aan waalid la socon((UAMs)[2]. Waxaana lagu qiyaasay in 15% ay ka kooban yihiin haween da' yar, kuwaas oo intooda badan ku nool xeryaha dadka bara-kacay ama dekedda u dhaw. Lama yaqaan tirad dhabta ah ee carruurta aan cidna la socon( UAMs) ee tahriibaya maadaama ay carruuur fara badan la socdaan, hase yeeshee, ilaa imminka waa dad waweyn. Waxay hay'adda UNHCR ee Yemen diiwaaan-gelisay carruur sheegatay inaysan cidna la socon balse ma jiraan tiro macquul ah oo ku sugan adeegyada UNHCR. Waxayna warbixintu tilmaantay in tirada dadka waayeelka ah ee u tahriibaya Yemen ay sii kordhayso. Maxaa yeelay dadkaasi ma haystaan hoy fiican, waxayna ku nool yihiin saboolnimo aad u liidata, iyagoo ay khasab ku noqotay inay seexdaan dulka adage ee dekedda u dhaw.

---

[2] Kooxaha aysan caerruurtu la socon,waxa loo tixraaca carruur aan waaayeelku la soconin,kuwaas oo kala nool yohiin waaalidka ama qaraabada ama sharci ahaan ama dhaqan ahaan ay mas’uul uga yihiin. Kooxdu kala u kala saareen carruurta kuwa qaraabo la socda ama dad kale oo waayeel ah balse waxay ka talo bixiyeen haddii qofani uusan awoodin inuu xannaaneeyo carruurtaas in markaasi loo tixraaco mid ahaan inay kala nool yihiin ama aan cidna lasocon oo ay keli yihiin. Eeg UNHCR, UNICEF, ICRC, IRC, Save the Children (UK), World Vision: Q*awaaniinta tusaalaynta hay’adaha isku-dhafan ee carruurta aan cidnala socon iyo ay lakala nopol yahay ee* Geneva, 2003

Waxaa dhawaan soo kordhay tahriibayaal u dhashay Kenya, Uganda,iyo Tanzania, kuwaas oo dhinaca badaha uga gudbaya min Puntland ilaa Yemen taas oo loo arkay is-beddel cusub oo soo kordhay markii ugu horreysay 2007. Shakhsiyaadka waddamadaas oo inta badan ku imaanaya shaqaalaha doonyaha badbaadada marakiibta iyo kalluumaysatada xeebaha Puntland ama "bad-maariinta" maraakiibta waaweyn ee u soo goosha Puntland. Waxayna si rasmi ah maraakiibtaasi uga soo amba-baxaan Mombassa. Waxaa loo malaynayaa inaan bartilmaameedka maraakiibtaasi ahayn Yemen, iyadoo shaqaalaha iyo rakaabkuba ku degaan Bossaso, waxayna ku biiraan qaxootiga iyo tahriibka.ilaa hadda tirada dadka toobiyahaas maraya aad bay u yar yihiin. Xitaadhib iyo kharat ayey kala kulmaan sidii ay ku gaari lahaayeen Bossaso iyagoo xaalad qalafsan kala kulma markaas ay goobtaas tagaan, la mana saadaalin karo inay xarun u noqon karto tahriibayaasha dibadda ka imaanaya marka loo eego khayraadka goobahaas hore uga jiray.

### 3.2 Isirrada Riixidda iyo Jiidista

Marka la isku-geeyo burburka dhaqaalaha, dagaallada iyo xad-gudubyada xuquuqda aadamiga ee ka jira Geeska Afrika, ayaa sii adkeeyey xaaladda tahriibka ee dadku ay ku doonayaa nabadgalyo iyo sidii ay uga soo shaqaysan lahayeen waddamada dibadda. Waxay noqotay mid ku adag jiilasha soo koraya inay u dulqaataan isirrada Riixidda iyo Jiidista,iyagoo door-bidaya inay ka tahriibaan deegaannadooda iyagoo tegaya goobo gaar ah, islamarkaana waxay ku mashquulayaan inay xog la xiriirta toobiyaha ay ka gudbayaan uruursadaan, inkastoo dhibaatooyin dhaqaale xumo ay u dheer tahay. Hase yeeshee, waxaa la xaqiijiyey arrimaha soo socda inay la kulmaan:

- Waraysiyada laga qaaday dadka ka soo bara-kacay Muqdishu 2007-dii, ayaa xoogga saaray cabsi xad-dhaaf ah iyo baahi ay u qabaan badbaado caalami ah inay ka mid tahay mudnaanta koowaad ee ay u soo cararayaan. Tan waxa ka mid ah iyadoo aysan jirin fursadaha heer-nololeedka, iyadoo ay xaaladdana sii adkeeyeen dagaalladi halkaas ka dhacayey. Maadaama ay hindisayaasha ku khasbaya in shakhsiyaadkaasi ay ku dhiiradaan tahriibka, laga yaabo inay is-beddeli karaan. Waxayna waraysiyada laga qaaday Bossaso tilmaamayaan in qaar ka mid ah dadkii ka soo bara-kacay Muqdishu ay nabad-gelyo dareemayaan inta ay joogeen Bossaso iyo haddii ay shaqooyin ka helaan, ma ay daneeyeen inay u sii gudbaan bartilmaameedkoodii ahaa dalka Yemen ama meelo ka sii dambeeya. Waxaa taas lidkeeda ah, qaar ka mid ah Soomaalida oo u arka in xaaladda nolosha Bossaso ay adag tahay, kuwaas oo aaminsan in heer-nololeedka dhaqaalaha iyo ammaanka Yemen uu ka muhiimsan yahay, iyagoo ku dhiiranaya inay markaas u bareeraan halista ay la kulmayaan tahriibka.

- Waxaa laga yaabaa sababta  ay u soo cararayaan qaar ka mid ah Ethioipian-ka ka imaanaya dhulalka joogga sare iyo hoose inay la xiriirto badbaado caalami ah ama sababo la xiririira xaddidnaanta fursadaha dhaqaalaha ee goobaahaas ka jira ama labaduba waa suuragal. Sida ay muujinayaan waraysiyada laga qaaday Ethiopian-ka ka soo jeeda dhul-hoosaadka ee Bossaso jooga, kuwaas oo laga yaabo inay door-bidaan inay ku sugnaadaan Bossaso, iyagoo aan danaynayn inay halista tahriibka Yemen u sii gudbaan.tan waxa lagu qeexayaa xiriirka adag ee dadka dhul-hoosaadka Ethioipia ay la wadaagaan qabaai'llada daaroodka ah ee Bossaso, kuwaas oo u oggolaanaya badbaado buuxda oo ay beelahaas ka helayaan iyo fursado ay ku shaqaystaan. Qaar kale oo iyaguna ka yimid dhul-hoosaadka ay u sii tahriiba Yemen sababo dhaqaale awgood, iyadoo dadka dhulka jooggiisu sarreeyo ka yimid aysan helin badbaado qabiil, waxayna door-bidaan inay sii tahriibaan, madaama aysan Bossaso ku haysan badbaadada dhinaca ammaanka iyo dhaqaale toona.

- Sida ay tilmaameen qaar ka mid ah dadka dhulka jooggiisu sarreeyo ee Ethiopia ka soo jeeda, waxaa ugu muhiimsan ee ay uga  tahriibayaanka Bossaso, waa dhaqaalaha. Waxaana dhiirigelisa 'sheekooyinka libinta helay' kadib markii qar ay ehel ahaayeen oo tahriibay ay fursado dhaqaale heleen oo ka shaqaystay waddamada khaliijka ama Yurub, kaddib markii ay Yemen ka sii gudbeen. Tan macneheedu looma qaadan karo inaan shakhsiyaadkaasi helin badbaadada caalamiga ah ee ay u baahan yihiin.

- Waxaa kaloo loo qaadan karaa in tahriibayaashu ay uga soo cararayaan dhulkooda hooyo iyagoo raadinaya istraatiijiyad nololeed, horumarka dhinaca dakhliga qoyskooda no ay ka mid yihiin; xawilaadda si tahriibka dhinaca baduu ugu najaxo. Tusaale, waxay Soomaaliya xawilaadaha ka heshaa in ka badan hal milyan oo jaaliyada  ballaaran ee dibadaha ku dhaqan, kuwaas oo sannadkiiba soo geliya adduun u dhexeeya USD 750 milyan iyo USD hal bilyan. Dakhlugan ma ahan oo qudha laf-dhabarka ganacsiga iyo adeegyada waaxyaha gaarka ah, balse wuxuu kobciyaa awoodda dhaqaalaha shakhsiga iyo qoyska. waxaana lagu qiyaasay wadarat guud ee sida tooska lagu soo xawilo dakhliga qoyaska inay sannadkiiba gaarayso ilaa USD 360 milyan.. Tani waxay ka mid tahay isirada dhiirigelinta ee dadku ay iskood wax u qabsanayaan, iyadoo xubnaha qoyskuna ay ugu soo xawilayaan Bossaso, taas oo noqotay xarumaha ugu muhiimsan ee kala wareejinta lacagaha caalamiga ah.

- Marka ay Soomaalidu tagaan dalka Yemen, waxaa loo aqoonsadaa qoxooti rasmi ah. Waxaana laga doodi karaa xaaladda tixgelinta mudan ee ay badbaadada ku helayaan inay ka mid tahay sababaha dhiirrigelin kara tahriibka shakhsiyaadka kale ee iyguna ka soo jeeda isla gobolka oo dhibaatooyiunka la wadaaga ama iyaguna  sheeganaya inay Soomaali yihiin. Marka ay qaxootigu helaan badbaado ka dhan ah *xad-gudubyada*, qaar badan  ayaa ku faafa dhulka xeebaha Yemen ka baxsan ama waddammada kale sababo kale duwan awgood, kuwaas oo ka hela fursado aad u muhiimsan  oo heerka noloshooda la xiriira. Dhab ahaantii, waxaan fursadahaas ka faa'iidaysan inta badan haweenka iyo carruurta oo ku nagaada xerada qaxootiga qudha ee Yemen ee Al Kharaz,oo Cadan ku dhaw.

## 4. Hawlgalka Tahriibka ee ku sii jeeda ilaa Yemen

### 4.1 Hawlgalka Tahriibka ilaa Yemen

Inkastoo aan xog dheeraad ah oo la xiriirta dhinaca hay'adaha dambiyada caalamiga aan laga hayn; haddaba shabakadaha Tahriibku waa kuwa iskaga gudba waddamada, kuwaas oo heshiisyo is-xambaar iyo qoxootiga la gala shakhsiyaad gaar ah, islamarkaana marxalad walba oo safarradooka ku lug leh la yeelanaya dadka ay khusayso. Qaar ka mid ah is-xambaarayaasha ayaa xiriir la leh shakhsiyad iyo mkooxo reer Yemen ah iyo qaxootiga Soomaalida iyo jaaliyadaha Soomaalida ee Kenya, inkastoo aan lagu kalsoonaan Karin xogta laga keliya ee laga heli karo Soomaalida Nairobi joogta ee ku saabsan hawlgalka shabakadda ee Soomaaliya.

Marka la eego Bossaso, qiyaas dheeraad ah ayaa tilmaamaysa ilaa 34 wakaaladood sida la sheegay (12 ka mid ah ay Ethiopian yihiin), dhawr boqol oo qof ayaa ka qaybgala shabakadda tahriibka, waxaana ka mid ah; Doonleyda,bad-maaxiinta,makhayadleyda, milkiilayaasha is-gaarsiinta internet-ka,telefoonnada,Booliiska,ganacsatada,gaadiidleyda iyo dadka guryaha leh. Waxa jira xaqiiq tilmaamaysa inay ku lug leeyihiin shakhsiyaadka dawladaha hoose ka shaqeeya iyo shabakadaha tahriibka. Tahriibayaasha Bossaso waxay si adag uga macaashaan adeegyada suuqgayntooda. Waxay wakiiladdooda jooga Muqdishu iyo meelaha kaleba kula xiriiraan is-gaarsiinta Raadiyaha Fooniyaha,tebinta xogta tooska ah iyagoo mararka qaarkoodna tahriibayaasha iyo qaxootigaba gaadiid u soo saara ilaa Bossaso. Waxayna wakiilladu marin habaabiyan baaxadda rakaabka ay doonidu qaadi karto si ay hoos ugu dhigaan halisteeda inat ay badda dhex gooshayso, iyagoo sidoo kale fursado dheeraad ah u raacinaya safarka ay ugu sii gudbayaan Yemen.

Marka ay ka helaan xogta milkiilaha in doontu ay diyaar tahay, durbadiiba wakiilladu waxay rakaabka ka soo qaadaan Bossaso, iyagoo gaynaya goobta amba-baxa. Goobta Mareero, waxa ku yaal makhayad ay wax ka cunaan tahriibayaashu ka hor inta aysan dhaqaaqin, maadaama aan loo oggolayn inay cunto iyo biyo toona doonida la fuulaan. Waxaa muran ka jiraan inaan doonyuhu lahayn musqulo ku filan doonyaha lagu kalluumaysto. Tahriibayaasha oo intooda badan ka kala socda muwaadiniin kala duwan, waxaa bad-maaxiintu si qalafsan ula dhaqmaan Ethiopian-ka marka la bar-bar-dhigo Soomaalida. Marka ay sugayaan, si adag ayaa rakaabka loo ilaaliyaa, iyagoo inta badan mukhaadaraad ama Qaad oo bahda maan-dooriyaha ka tirsan. Qaabka rakaabka loo raro waa uu nidaamsan yahay, islamarkaana waxaa tahriibayaasha lagu safaa xeebta,waxayna ku galaan socod,iyadoo ay dabley ilaalinayso, ayaana la geeyaa gunta hoose ee doonyaha taagta daran ee ku xidhan xeebta.

Warbixn ay soo saaray Booliiska Puntland ayaa shaaca ka qaaday ilaa qiyaastii 12-14 doonyood inay ku lug leeyihiin ganacsiga tahriibka. Ugu yaraan doontiiba waxay gooshtaa labo goor bil walba. Celceliska dhaqaalaha safarka Yemen, ayaa lagu qiyaasayinta u dhaxaysa USD 50 iyo USD qofkiiba, iyagoo rakaabka doonyahah waaweyn oo qaada ilaa inta u dhaxaysa 100-120 qof. Socdaalka doonyahah dheereeya ee ka baxa xeebta ku dhaw dekedda Bossaso, ayaa qiimahoodu gaarayaa ilaa USD 150 sida ay xustay xogta la isla dhex-marayo ee muujinaysa in faa'iidadada laga helayo ay aad u sarreyso, islamarkaana uu aad u horumarsan yahay iskaashiga is-xambaarayaasha dhexdooda ah, haddii ay doontu degto ama ay gacanta ku


dhigaan ilaalada lxeebaha Yemen, isla toddobaad gudihiis ayey wakiillada iyo milkiilayaashuba ku soio iibsadaan dooni cusub.


**4.2 Imaatinka Yemen**

Waxaa u soo gudbitaanka Yemen uu socdaaa sannadka oo dhan, inkastoo uu jiro korosiimo inta u dhaxaysa August iyo April sannad walba, taas oo tilmaamaysa inay mawjaha baddu ay inta badan deggan yihiin. Sannadkii 2007, waxaa la xaqiijiyey inuu kordhay qiyaasta intii lagu gada jiray bisha Barakaysan ee Ramadhan, markaas oo dadka la waraystay ay sheegeen inay rumaysan yihiin in ilaalada xeebaha Yemen ay dabciyaan gayfa-naantooda. Waxaa la xaqiijiyey Bishii January ee 2007 inay Yemen gaadheen ilaa 788; halka hal sano kaddibna bishii January 2008, tiradu ay korodhay ilaa 4,481, taas oo ah in ka badan shan goor kororsiimo dhan, kuwaas in ka badan seddex meel meel ahaan ay ka soo galeen min Djibouti.

Waxayna soo dhaweynta kuwa imaanaya dhammaan xeebaha Yemen ay ku teedsan tahay dhul-xeebeed gaaraya ilaa 2,400 km oo xeebaha Yemken ah ee (badda cas iyo Gacanka Cad-meed). Halka ay sannooyinkii tegay ay goobahaasi ay ku teedsanaayeen ilaa 165km oo ku fidsan xeebaha gobolka Shabwa province, kuwa dhawaan yimid ayaa xusay inay ka soo degeneen dhul kala duwan ee gobollada kale ee xeebaha ku yaal sida; Abyan, Aden iyo Taiz, kuwaas oo la socosho ku samaynaya dhaqdhaqaqa gurmadka deg-degta ah dhibaatooyinka adag ee ay la kulmaan. Waxayna qaxootigu ka soo degaan meel u dhaw Bel Har, ama Bir Ali, iyadoo loo raro xarun ku-meel-gaar ah ee ay dhistay shirkadda gaaska dabiiciga ah ee dhulka Yemen (LNG), iyadoo ay ka hawlgasho iskaashatada bushada ee dhinaca bini'aadminnimada (SHS), ka hor inta aan loo rarin xarunta soo dhaweynta UNHCR ee Mayfa’ah, oo ah masaafo loo socon karo ilaa 45 daqiiqo oo gaari ah ee dhulka berriga ah marka laga yimaado Bir Ali. Waxay kaloo hay'adda UNHCR xero kale oo soo dhaweyn ah ka samaysay Ahwar ee xeebta Abyan si loogu gurmado kuwa ka soo galay xeebta gobolka Abyan.
Dhab ahaantii, kuwa imaanaya Dubab iyo Al Mohka ee dhinaca badda cas, waxa loo wareejinayaa xarunta soo dhaweynta ee xerada qaxootiga AL Kharaz. La hawlgalayaasha UNHCR ayaa abaabulay koox reer guuraa ah oo indha ku haynaya dadka soo galootiga ah ee xeebaha, halkan xarumaha muhiimka ah loo calaamadeeyey dhulka xeebleyda ah, kuwaas oo la soo xiriiraya UNHCR ama hay'adaha aan dawliga ahayn si ay ugu wargeliyaan qaxootiga soo galaya. Xarunkasta oo kuwa soo dhaweynta ka mid ah, waxaa qaxootiga laga siinayaa daawo, biyo iyo cunto. Waxayna xarunta soo dhaweyntu siinaysaa labo ama seddex maalmood oo nasasho ah. Maadaama in ka badan 30 goobood laga soo galo dalka Yemen, tirada dadka cusub ee imaanaya, rasmi ahaanuma helaan hab-raacyadaas ama UNHCR ma wada diiwaangeliso,taas oo ka mid ah caqabadaha hortaagan tiro-koob rasmi ah oo laga helo dadka cusub ee soo galaya.

Marka ay yimaadaan Yemen kaddib, waxay dadka qoxootiga ahi sii wadan karaan safarradooda iyadoo adeegsanaya shabakadaha nidaamsan ee tahriibka, iyagoo isku dayaya inay socdaalaan ama adeegsadaan tahriibka aan rasmiga ahayn, kuwaas oo gacan ka helaya gobo xudduudaha ku dhaw. Si loogu helo dhaqaale ay safarkooda ku sii wataan, waxay dadka qaxootiga ahi ka shaqeeyaan beeraha ama hawlha guryaha ama shaqooyinka muruq-maalka aan xirfadajha lahayn.




**Muuqaalka 3: tira-koob ku salaysan xogta laga helay imaatinka Yemen**

# WAAXDA II: CAQABADAHA

## 1. Caqabadaha Qaxootiga iyo Badbaadada Xuquuqul Insaanka

### 1.1 Xeerarka Xuquuqul Insaanka ee Caalamiga ah iyo Heer Qaran

Qoddobadan hoos ku qoran waa shuruucda iyo xeerarka caalamiga ah iyo heer Gobol ee la xiriira badbaadada Qaxootiga, dadka gudaha ku bara-kacay iyo tahriibayaasha:

- Xeerarka caalamiga ah ee xuquuqul insaanku waxay ku waajibinayaan in dawladuhu ay ilaaliyaan xuqquuqda bini'aadmiga ee garsoorkooda hoos yimaada, iyadoon loo eegayn xaaladdooda gaarka ah. Golaha sharcigan wuxuu hoos imaanayaa baaqa caalamiga ah ee xuquuqul insaanka (UDHR),iyadoo uu ka mid yihiin xeerarka caalamiga ah ee 1965 ee la xiriiray cirib-tirka dhammaan noocyada midab-takoorka (CERD), heshiiskii caalamiga ahaa ee xuquuqda rayidka iyo siyaasadda ee 1966 (ICCPR), heshiiskii caalamiga ahaa ee dhaqaalaha, bulshada iyo xuquuqda dhaqanka ee 1966 (ICESCR), heshiiskii 1979kii ee cirib-tirka dhammaan noocyada midab-takoorka ka dhanka ah haweenka (CEDAW), heshiiskii 1984kii ee falalka jir-dilka ka dhanka ah (CAT) iyo heshiiskii xuquuqda carruurta (CRC). Wuxuuna qaab-hawleedka caalamiga ah ee xuquuqul insaanku dhammaystirayaa xeerarka xuquuqul insaanka heer gobol sida Axdiga Afrika ee xuquuqda dadka ee 1981 iyo axdigii xuquuqul insaanka ee jaamacadda carabta oo ay Dib-u-eegeen dawladaha Carabta May 22, 2004, kaas oo si rasmi ah u dhaqan galay 15 Maarso 2008.

- Heshiiskii 1951 ee la xiriiray xaaladaha qaxootiga (heshiiskii 1951), baratakoolkiisii 1967 oo sidoo kale la xiriiray xeerarka heer gobol sida heshiiskii maareynta xaaladaha gaarka ah ee dhibaatooyinka qaxootiga Afrika (heshiiskii qaxootiga OAU ee 1969), kaas oo lagu taabbagaliyey xeer-sharciyeedka badbaadad caalamiga ah ee qaxootiga. Xeerarkan iyaga ah, ayaa qeexaya dadka u baahan badbaadada iyo dhawrista xuquuqda ay lagama maarmaanka tahay inay ka faa'iidaystaan. Qoddobada asaasiga u ah sharciga qaxootiga caalamiga ah, waa *xad-gudubyada ka dhanka ah* ama kuwa aan dib-loo-celin karin, iyadoo laga ilaalinayo inaan si tabaruc ah aysan xitaa ugu laaban karin waddamada ay cabsidu ka taagan tahay. Waxay kaloo qaybtani ka mid tahay xeerka caalamiga ah ee taas oo xitaa ay fulinayaan waddamada aan weli saxiixin heshiiska badbaada qaxootiga. Waddamada Soomaaliya, Ethiopia, Jabuuti, iyo Yemen dhammaantood way saxiixeen heshiiska 1951 iyo Baratakoolkiisii 1967kii.

- Dadka gudaha ku bara-kaca, waxaa ilaalinaya shuruucda heer qaran ee hoos yimaada heshiiska caalamiga ah, iyagoo mudnaan gaar ah la siinayo marka loo eego shruucdii 1988kii ee tilmaamaysay dadka gudaha ku bara-kacay. Maadaama aysan waafaqsanayn qaab-sharciyeedka sida, shuruucda tilmaamaysa meel-marinta shuruucda jirta ee xuquuqul insaanka, waa in lagu tirtirsiinayo inay maamuulada ay hoos-tagaan ay si dhab ah u dhawraan xuquuqda dadka bara-kacay( IDPs).

- Shaqalaha qaxootiga ah ee ka shaqeeya dalalka shisheeye, waxaa ilaalinaya heshiiska caalamiga ah ee badbaadada dhammaan xuquuqda shaqalaha qaxootiga ah iyo Xubnaha

Qoysaskooda (CMW). Weli heshiiskan (CMW) Ethiopia, Yemen, Somali ama Djibouti. Wuxuu xoogga saarayaa heshiiska(CMW) qofka aqoonta u leh hawlaha qaxootiga ee hoos imaanaya xirfadihiisa si uu markaas fursad ugu helo xuquuq u dhiganta khibraddiisa, iyadoon loo eegayn xaaladda sharci-ahaaneed ee ay ku sugan yihiin. Heshiiska(CMW) wuxuu waafaqsan yahay heerka shaqaalaha caalamiga ah iyo sidoo kale sharciga xuquuqda aadamiga. Qaybta VI ee heshiiska (CMV) wuxuu soo rogayaa shuruuc xiriir oo ku wejahan waddamada ka qaybgalay ee danaynaya kobcinta"tayada, sinnaanshaha, bini'aadminnimada iyo shuruudaha sharciga waafaqsan ee shaqaalaha qaxootiga caalamiga ah iyo xubnaha qoysaskoodaba".

Xeerarka caalamiga ah iyo kuwa heer gobolba waa ay ku khasban yihiin inay dhamman waddamada xubnaha ah ay fuliyaan. Tani waxay abuuraysaa waajibaad, balse ma ahan oo keliya in la iska ilaaliyo faragalintooda dhinaca badbaadada xuquuqda ee xeerarkan waafaqsan balse waxay kaloo u baahan tahay inay waddamadu tallaabada ugu habboon ka qaadaan sidii loo badbaadin lahaa dadkaas iyagoo raacaya garsoorkooda ka dhanka ah xad-gudubyada hay'adaha gaarka ah ay gaysanayaan. Waaxda hoos ku qoran,ayaa tilmaamaysa xad-gudubyada iyo meel ka dhaca ka dhanka ah xuquuqda ha ahaato ama yeysan ahaanin sababta xad-gudubkaasi mid toos ah u taabanaya maamulka dawladdas iyada ah.

### 1.2 Caqabadaha badbaadada inta lagu jiro duulimaadka/ha-ka-shada

Tahriibayasha ka imanaya min Ethiopia, waxay la kulmaan xad-gudubyo dheeraad ah inta ay safarkooda min Addis Ababa ama goob kale ilaa Bossaso. Intooda badan waxay ku sugan yihiin nolol liidata, iyagoo seexda meel banana, waxayna ka shaqeeyaan hawlah muruq-maalka aan xirfadda lahayn ama waxa lagu dhiig-miirtaa shaqooyinka. Intaas waxa u dheer, shilalka dhimashada ee shubanka, hypothermia, qaniinyada maska iyo dhibaatooyin la mid ah, waxaana si joogta ah qaxootiga iyo tahriibka u soo food-saaraya xad-gudubyo ka dhan ah bini'aadminnimada sida; dilka, dhaca iyo kufsiga inta ay xarumaha ha-ka-shada ku sii jiraan.waxayna warbixintu tibaaxday inay xad-gudubyadaas u gaystaan dadka ay ka mid yihiin; Booliska, madaxda dawladda, xubnaha maleeshiiyooyinka, dambiilayaasha caadiga ah iyo kooxaha is-xambaarka qudhooda.

Xarigga iyo masaafuriska ay hay'adda sharci xoojintu u gaysanayaan tahriibayaasha ama qaxootiga sii maraya maamuullada Soomaliland iyo puntland ayaa sii kordhayey, taas oo dhawr goobood ka dhacday 2007, welina dhacdooyinkaasi way sii socdaan sannadkan 2008. Dhinaca Puntland, waxay si gaar ah diiradda u saaraan Soomalida ka soo bara-kacday Gobolka bartamaha-koofurta , kuwaas oo lagu xiray Garowe, dabadeedna dib loogu celiyey Bartamaha-koofurta Soomaaliya, iyagoo la sii mariyey Galkayo. Labo dhacdo, ayaa bilihii February iyo May 2007, in ka badan 450 qof oo Soomaali ah oo ku jireen carruur iyo haween ayaa lagu xiray xabsiyo heerkoodu aad u hooseeyo, kuwaas oo markii dambe qaar ka mid ah loo masaafuriyey bartamaha-koofurta Soomaaliya.

Xiriir wacan ayaa u dhexeeya Somaliland iyo dawladda Ethiopia iyadoo ay (wakiillada ganacsiga ee u fadhiya Hargaysa oo kaalin weyn ka qaateen). Bishii August 2006 , waxaa la xiray muwaadin Ethiopian ahaa oo magan-gelyo doon ahaa oo ka soo jeeday dhulka jooggiisu sarreeyo ee Ethiopia, kaasoo lagu eedeeyey inuu Eritrea xiriir la leeyahay, kaddib markii codsi

ka yimid wakiillada Ethiopia, *kaasoo dib-loogu-celiyey Ethiopia,* waxaana si xad-gudub ah loogu ciqaabay muddo dheer, ka hor intaan wax dacwad ah lagu soo oogin, isaguna waa beeniyey eedaymahaas loo soo jeediyey. Tahriibayasha iyo qaxootiga ka soo jeeda dhulka jooggiisu hooseeyo ee Ethiopia ee magan-gelyo doonka ah ayaa la kulma cabsi joogto ah, xarig iyo *dib-u-celin.* Dad tiro badan oo loo gaystay masaafuris ilaa Ethioipia ayaa laga diiwaangeliyey Somaliland, Qaar ka mid ah mucaaradka Ethiopia ayaa si ula kac ah loogu masaafuriyey Ethiopia. Dadka Soomaalida ah ee ka yimaada gobollada aan Somaliland ahayn, ayaa iyaguna halis ugu jira in la masaafuriyo, waxaana ka mid ah shakhsiyaad ka yimid Bartamaha-koofurta Soomaliya.

### 1.3 Caqabadaha badbaadada ee Bossaso

Xaaladda nolosha Bossaso ayaa waxay ku adagtahay dadka tahriibka ah, dadka bara-kacay iyo si la mid ah qaxootigaba. Halka qaar ka mid ah dadka bara-kacay ay la nool yihiin xubno ka mid ah bulshada maxalliga ah, iyadoo Ethiopian-ku ay door-bidaan inay ku noolaadaan guryaha iyo xeryahay agagaarka dekedda. Inta ay Bossaso ku sugan yihiin, intooda badan tahriibka iyo qaxootiguba waxay dhab ahaantii u muuqdaan kuwa u qafaalan wakiillada tahriibka. Waxay ku tiirsan yihiin cuntada, hoyga iyo is-gaarsiinta. Waxayna tahriibku ku khasban yihiin inay isticmaalaan adeegyada wakiillada iyo shabakadaha tahriibka. – ama wayna ku khasban yihiin inay bixiyaan xitaa haddii aysan isticmaalin, maxa yeelay waxay waayayaan fursadaha tahriibka. Ganacsatada tahriibku waxay kiraystaan dabley hubaysan si ay u ilaaliyaan tahriibayaasha marka ay amba-baxayaan. Dableydaan ayaa ka mas'uul ah dhaca, kufsiga iyo xad-gudubyo dilku ka mid yahay oo ay mararka qaarkood u gaystaan dadkii loo soo kireeyey inay ilaaliyaan.

Xaaladda hoyga ay u kireeyaan wakiillada iyo tahriiblaydu dadka qaxootiga ah ayaa aad u liidata. Waxay Ethiopian-ku ku nool yihiin goobo ciriiri ah, hoy dusha ka furan iyadoo aysan jirin faya-dhawr habboon. Saamaynta xaaladda caafimaad darrida ah ayaa si gaar ah u saamaysay dadka tabaalaysan ee haweenka iyo carruurta ka mid yihiin. Walow ay tahriibayaashu ka faa'iidaystaan adeegyada cisbitaallada marka shilalka ama xannuunsadaan, dhab ahaanntii lama seexiyo cisbitaallada Bossaso, maadaama aysan awood u lahayn inay iska bixiyaan kharajyada daaweynta oo (celcelis ahaan la tashigu uu gaarayo 50,000 shilling Soomaali ah ama qiyaastii USD 2) ama aysan ku lahayn qoys ama qabiil taageeraya. Xitaa haddii ay hay'adaha caalamiga ah taageero u fidiyaan cisbitaallada, waxay qoxooti badan sheegayaan in loo diido seexinta bukaannada.

Waxaa soo if-baxay labo hindise oo muhiim ah oo asal ahaan taabanaya caqabadaha xuquuqda bini'aadmiga ee soo food-saaray shakhsiyaadka tahriibayaasha isku-dhafan ee u gudbaya Bossaso: waa tan koowaade, shakhsiyaadkaas oo aan haysan qaab-dhismeedka badbaada, iyagoon awoodin kuwa halkaas ka jira ama uusan ku filnayn qaab-dhsimeedka cadigaa ah ee halkaas ka jira, tan labaad, sida aan xusnay, haweenka iyo carruurta ayaa dhibka ugu badan ku dhacayaan. Saamaynta jaantusyada muujinaya badbaado la'aanta waxaa ka mid ah:

- Fal-dambiyeedyada baahsan oo ay dambiilayaashu gaystaan waxaa ka mid ah, dambiyada culus iyo xiisadaha fal-dambiyeedka hordseeda

- Burcadda laga sameeyo xeryaha qaxootiga ay ugu tallaabsadaan xad-gudubyo ka dhan ah kooxaha bulshada marti-gelisay tahriibayaasha, iyadoo aysan meeshaas ka maqan yihiin hay'adihii sharciga iyo kala dambaynta
- Dhaqaalaha xeryaha dadka bara-kacay oo ay gacanta ku hayaan qabaa'ilka u badan deegaanka, iyadoo lagu dhiig-miirto xubnaha qabaa'ilka yar yar.
- Milkiilayaasha guryaha oo kirada ku adkeeya tahriibayaasha, qaxootiga iyo dadka bara-kacay, iyagoo mararka qaarkoodna haweenka fara-xumayn khasab ah loo gaysto
- Booliiska oo ku xad-gudbaya dadka ajnabiga ah, labadaraadle; Ethioipianka iyo dadka ka baxsan beelaha maxalliga ah ee daagaanka u badan.

Tusaale ahaan dhibaatooyinka u gaarka ah haweenka iyo carruurta waxaa ka mid ah:

- Tahriibayaasha cusub, qaxootiga iyo haweenka iyo carruurta bara-kacay, waxa gargaar u fidiya shakhsiyaad uga beddelanaya madaamada aysan awoodin inay dib u bixiyaan in loo tababaro kuwa jirkooda gata. Haweenka jirkooda gata, ayaa la sheegayaa in qaar ka mid ah macaamiishoodu ay habeenkii guryahooda ugu yimaadaan oo ay kufsadaan.
- Haweenka iyo carruurta ayaa la weeraraa, mararka qaarkood xoog lagu kufsada madaama ay bannaanka seexdaan ama marka ay biyaha iyo cuntada raadsanayaan.
- Weli waxa si xoog leh uga jira xeryaha qaxootiga gudnuiinka xubnaha taranka haweenka (FGM) iyadoo xaaladda rugaha caafimaadkuna ay aad u liidato.

Waxaa magaalada Bossaso ka dhacay 5tii February 2008, labo qarax oo culculus, goobtaas oo la ogyahay inay qaxootiga Ethiopian-ku ku badan yihiin. Ilaa 21 qof oo Ethiopian rayid ayaa wadar ahaan ku dhintay, iyadoo ay ku dhaawacmeen in ka badan 70 qof. Inskastoo ay mas'uuliyadda qaraxaas sheegteen kooxda *Al Shabaab* haddadana waxaa muuqata inay jiraan xiriir dhinaca dadka ka ganacsatada tahriibka oo khilaafyo soo dhexgaleen. War cad oo qeexaya hadafka weerarkaas isaga ah ilaa imminka lama hayo. Waxaanse shaki ku jirin, in qaraxyadaasi ay sare u qaadeen mudnaanta badbaadada tahriibayaasha iyo qaxootiga ee Bossaso.

### 1.4 Caqabadaha Badbaadada inta lagu jiro u gudubka Yemen iyo wixii ka dambeeya

Waxa si cad loo ogyahay, loona diiwaangeliyey xad-gudubyada jir-ahaaneed ee loo gaysto tahriibayaasha inta ay u sii socdaan Gacanka cad-meed. Waxana xad-gudubyadas ka mid ah garaac,tooriyeyn, toogasho, gubis, asphyxiation, neef-qabatow, dayac u horseeda fuuq-bax iyadoo ay caadi noqotay dadka oo doonta laga tuuro oo la qarqiyo (taas oo si ula kac ah loo dilo qofka iyo iyadoo marka ay doonidu ku soo dhawaato xeebaha Yemen, ay ku daadiyaan si ay shaqaalahu doonta ula cararaan). Rabshadaha ayaa mararka qaarkood horseeda inay shaqaalaha doontu ciqaabo anshax-marineed ay ku soo rogaan rakaabka doonta saaran, taas oo u horseeda inay qara-qanto ama laga digniin helo. Sannadkii 2007,ilaa 28,882 qof oo isku dayayey inay gudbaan ayaa qiyaas ahaan 1,225 qof(ugu yaraan 4% wardarta guud) ayaa la rumaysan yahay inay qaraq-meen ama ay dileen shaqaalihii iyaga tahriibinayey.
In la gaaro xeebaha Yemen ma noqon doonto dhammaadka halista ay la kulmaan tahriibayaasha safarka samaynaya. Shaqaalaha tahriibka, ayaa inta badan ku khasba inay

rakaabka oo ay haween iyo carruur ka mid yihiin inay doonta kaga boodaan masaafo dhawr boqol oo tallaabo xeebta u jirta si ay ugu dabaashaan maasaafada kama dambaysta ah. Waana barta la xaqiijiyey inay dad fara badan ku dhintaan.
Marka ay Yemen garaan, ayaa waxa soo if-baxa warar sheeegaya inay jiraan qaxooti tahriib ah oo ay haween iyo carruurba ka mid yihiin oo aan haysan hoy,iyagoo seexda meelaha ay heerkoodu liito. Kuwa u sii gudbaya waddamada kale, ayaa la kulma halis la mid ah middii ay hore u soo mareen, sida; dhiig-miradka dhaqaalaha, iyagoo lagu iloobo dhulka lama-degaanka ah, in loo adeegsado kuwa jirkooda gata ama silsiladda is-xambaarka, kufsiga iyo dhac iwm.

## 2 .Siyasadda iyo Awoodaynta Xirfadaha Maamulka Heer Qran iyo Heer Gobol

### 2.1 Puntland

Marka ay Puntland ku naaloonayso heer horumarsan ee maamul-goboleedka kaddib markii caqabado la soo gudboonaadeen maamulkii dhexe ee Soomaaliya, taas macneheedu ma ahayn inay tahay dal madax-bannaan. Sidaas awgeedna ma aysan saxiixin heshiisyada caalamiga ah ama xeerka badbaadada heer gobol, balse waxay ku khasban tahay inay fuliso kuwa ay Soomaaliya saxiixday. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira hawlgallo fara badan oo muujinaya inay Puntland ka go'an tahay meel marinta xeer iyada u gaar ah ee ku wejahan dadka bara-kacay.

Bishii September 2006, tusaale ahaan wuxuu maamulka Puntland meel mariyey xeer madaxweyne[3] kaas oo mabnuucayey tahriibka dadka iyo hawlaha la xiriira, kaddib markii ay xabsiga u taxaabtay ilaa 1,370 qof oo Ethiopian ah, iyadoo masaafurisay. Hay'adda UNHCR iyo hay'ado kale ayaa soo fara-geliyey markii masaafuriska deg-degta ah lagu dhawaaqay. Kaas oo ay ka dambaysay ilaa 600 qoxooti kale ah. Inkastoo hay'adaha caalamiga ah dadaalkoodii la xiriiray inay baaritaan ku sameeyaan badbaadada ay dadkaasi u baahan yihiin, ay u horseeday caga juglayn xarig iyadoo masaafuriskiina uu sii socday, iyadoon loo aabba-yeelayn xaaladda dadka tabaalaysan.

Waxaa lagu tilmaamay xeeerka madaxweyne inaan maamulka Puntland uusan lahayn siyaasad hufan oo lagula dhaqmo tahriibayasha. Islamarkaana tallaabooyinka ay qaadayaan aysan ahayn kuwa ku habboon badbaadada qaxootiga. Ma jiraan hay'ad ama wasaarad qeexaysa waajibaadka dhammaan arrimaha qaxootiga tahriibka ah, gaar ahaanna waxaa hawlahas oo dhan fulisa wasaaradda arrimaha gudaha iyo Ammaanka. Puntland ma lahan waax awood u leh sharciga maaraynta tahriibka ee heer caalami ah,iskaba daaye, tobanaanka kun ee tahriibka aan rasmiga ahayn, qaxootiga iyo dadka bara-kacay. Madaxda dawladdu waxay xaqiijyeen hawlaha tahriibka sharci-darrida ah, iyagoo awood u helay inay gacanta ku dhigaan dhawr doonyood, ayna la wareegtay. Hase yeeshee, xarigaasi uma muuqdo inuu qayb ka yahay siyaasad cad ama istraatiijiyad lagu xakamaynayo dhacdadan iyada ah, balse waxay qaaday tallaabooyin lagu go'doominayo tahriibayaal gaar ah,kuwas oo dhawr toddobaad kaddib la sheegay in la soo daayey oo ganacsigoodii dib ugu laabteen.

Waxaa si weyn loo aqoonsaday in Booliiska Puntland ay horumar ka sameeyeen inay xaddidaan tahriibka dhawr sano ka hor. Intii u dhaxaysay 2002-2003, waaxda boolisku waxay

[3] Puntland 2006 – Decree No 01/09 of 25 September 2006

qaadeen tallaabooyin wax ku ool ah oo ka dhan ah kooxaha tahriibka ka ganacsada, iyadoo sidoo kale, 2003, ay si weyn u xakameeyeen dhaqdhaqaaqa tahriibka. Sida ay xaqiijyeen saraakiil dawladda ka mid ah, wuxuu dadaalkaasi si weyn u xumaaday afartii sano ee la soo dhaafay. Waxayna sheegeen inay sabab u yihiin:

- Xad-gudubyo dhinaca hawlgalka ah
- Iyadoo aysan jirin siyaasad lagu xakamaynayo tahriibka, islamarkaana laga yaabo inay qayb ku leeyihiin ganacsigaas qaar ka mid ah mas'uuliyiinta sar sare ee maamulka Puntland (taas oo imminka laga yaabo inay sii xumayso jawiga nabadgalyada Puntland)
- Xaddidnaanta taageerada laga helo Beesha Caalamka

**2.2 Somaliland**

Somaliland ma ahan dawlad caalamku aqoonsan yahay,mana aysan ansixin heshiisyadii 1951, Baratakoolkiisii 1967, heshiiskii qaxootiga OAU ee 1969,heshiisyadii dawlad la'aanta ee sannadaihii 1954 iyo 1961 ama arrimaha kale ee la xiriiray ama xeerarka heer goboleed. Hase yeeshee, waxaa dastuurka Somaliland tilmaamayaa inay sii wadayaan heshiisyada caalamiga ah iyo xeerarkii ay hore u saxiixday dawladdii hore ee Soomaaliya oo ay ka mid ahaayeen xeerarkii xuquuqul insaanka iyo heshiisyadii qaxootiga 1951 iyo 1969 intaas waxaa dheer iyagoo xusay inay xurmaynayaan siyaasiyiinta magan-gelyo doonka ah ee sida sharciga ah dalka ku soo gala ama degan xuduudaha Somaliland. Sheegashada madax-bannaanida aan la aqoonsanayn ee  Somaliland, ayaa waxaa culays ku kordhisay qaabka ay ula dhaqanto dadka “ajnabiga ah.” Dadka ka soo cararaya bartamaha iyo koofurta Soomaaliya ama aan ka soo jeedin qabaa'illada waaweyn ee aan ahayn muwaadiniinta Somaliland sida ku xusan dastuurka balse, waa dad bara-kacay sida sharciga caalamiga ah tilmaamayo.  October 2003, kaddib dilkii afar ka mid ahaa shaqaalaha gargaarka, ayaa madaxweynaha Somaliland wuxuu ku dhawaaqay "*siyaasadda masaafurinta ajnabiga".* Waxaa tallaaban loo qaabeeyey xeer amraya inay ajnabiga sharci-darrada ah  dalka uga baxaan 45 maalmood ah. Xeerkaasi wuxuu keenay xayiraad aan rasmi ahayn, mawjado weerraro ah, dhac iyo xad-gudubyo guud oo loo gaysanayo dadka aan reer *Somaliland ahayn.* . markii siyasaddas la hakiyey, ayaa waxaa soo xoogaystay fikradaha ka dhanka ah dadka loo aqoonsado inaysan Somaliland u dhalan. Waxay UNHCR ogaatay sannadkii 2006, in qayb ka mid ah dawladdu ay arrimaha qaarkood ee ay ku lug leeyihiin dadka ajnabiga ah ay ku macneeyaan ‘ammaanka Qaranka’, taas oo awood dheeraad ah oo dhinaca garsoorka ah siinaysa guddiga ammaanka qaran. Sida kor ku xusan, waxaa weli sii soconaya ilaa sannadkan 2008, xariga iyo masaafuriska dadka ajnabiga ah iyo Soomaalida ka timaadda bartamaha-koofurta Soomaaliya.

**2.3 Yemen**

Waxay imminka Yemen ku hawlan tahay siyaasad dhammaystiran oo tahriibka ah. Wasaaradda cusub ee dhawaan loo sameeyey qaxootiga ayaa weli ku jirta marxaladdii hore,iyadoo taageero ka sugaysa beesha caalamka. Waxay wasaaradda arrimaha guduhu leedahay waax qaabilsan socdaalka, iyadoo ka hawlgasha qabashada qaxootiga sharci-darrada ah,halka wasaaradda arrimaha dibaddu ay leedahay (Waaxda Qunsuliyadda) oo iyaduna ku hawlan maaraynta qaxootiga. Guud ahaanna waxay iskaashi la leeyihiin; hay'adaha dawladda sida; (ilaalada xeebaha,ammaanka qaranka,wasaaradaha Xuquuqul insaanka, caafimaadka iyo Jaamacadda

Sanca). Magacaabidda xarumaga la socoshada ee dawladda, Guddoomiye-goboleedyada, xarumaha qaxootiga/soo dhaweynta, ayaa sare u qaadaya hufnaanta hawlgallada iyo iskaashiga awoodaynta xirfadaha shaqada.

Waxay dawladda Yemen ansixisay, saxiixdayna heshiisyo xiriir ah oo faqradaha qaarkood ay ku jiraan shaqa siinta qaxootiga. Iyadoo la tixgelinayo qaabka waddammada looga soo dirayo si gaar ah (uga shaqaynaya shaqooyinka gudaha) waxaa kalo jira heshiisyo ay la gashay waddammada Ethiopia, Eritrea iyo India. Waxaa Yemen ka jira labo sharci shaqaaale. Sharciga lam.19 ee 1991 iyo sharciga Lam. 5 ee 1995, oo xambaarsan xirfado kala duwan oo nidaaminaya shaqaalaynta ajnabiga. Sida qaanuunku qabo, ajnabiga qudha ee haysta ruqsadaha shaqada, ayaa heli kara degaannaashaha dalka, iyadoo ruqsadaha shaqada qaarkood ay xaddidan yihiin (tusaale, shaqaalaha dhismaha, shaqaalaha maamulka,shaqaalaha beeraha iyo qaar ka mid ah adeegyada).
Si looga hortago qaxootiga aan dukumentiga haysan, waxay dawladda Yemen, si joogto ah ugu wargelisaa tallaabooyin xaddidan oo lagula soconayo xaaladda degenaanshaha ajnabiga. Dhawaan, waxa qaxootiga loo sheegay inay helaan ruqsadaha degenaanshaha, haddii kale waa la xirayaa, dabadeedna waa la masaafurinayaa. Waxa digniin loo soo jeediyey ganacsatada ay u shaqeeyaan ajnabaiga aan dukumeniga lahayn, waaxaa lagu wargeliye inay u diyaariyaan degennaansho iyo ruqsado shaqo muddo dhawr toddobaad ah gudahood. Sababta tallaabooyinkan looo qaadayo, waa iyadoo ay soo kordhayaan qaxootiga tahriibka ah oo si gaar ah uga imaanaya Somalia iyo Ethiopia, kuwaas oo culays dhaqaale ku haya dalka. Arrinta kale ee la tilmaamay, waa ammaanka qaranka.
Waxay Yemen oggolaatay heshiiskii qaxootiga ee 1951 iyo Baratakoolkiisii 1967 iyo 1980. Sharciga gaarka ah ee qaxootiga weli lama taabbagalin, walow uu jiro qoraalka qabyada ah ee sharciga qaxootiga, waxaana dawladda ka go'an dhaqan-gelintiisa. Waxayna Yemen hore u meel marisay inta badan shuruucda heerarka caalamiga ah ee xuquuqul insaanka oo ay caqabado hor yaalliin.

Waxay Soomalidu Yemen soo galeen markii ay dhacday dawladii 1991, iyadoo saraakiisha Ethiopian iyo xeel-dheerayaashii tababarnaa ay u soo qaxeen kaddib markii la riday xukuumaddii Mengistu kuwaas oo laga siiyey xeryaha qaxootiga dalka Yemen tixgelinta xuquuqda buuxda ee magangalyada. Dhammaan dadka kale ee magan-gelyo doonka ah, waxaa loo eegayaa xaaladda shakhsiyaddiisa ee dhinaca qaxootinnimada. Inta aan Soomaalida ka ahayn, waxaa aqlibiyaddoodu ka soo jeedaan Ethiopia, kuwaas oo sida ay dawladdu u aragto ah tahriibayaal dhaqaale oo aan rasmi ahayn.
Waxa sida badan laga soo qabtaa iyagoo wareegaya magaalada Sanca, dabadeedna waa la masaafuriyaa. Waxayna natiijadu noqotay in Ethiopian-ku isku dayaan in si dhaqso ah iskood ugu guuraan durbadiiba marka ay soo degaan xeebaha Yemen, iyagoo ka baxsanaya inaan la gaynin xeryaha soo dhaweynta, si aysan u oggaanin dawladda Yemen. Tanina waxay ka mid tahay caqabadaha hortaagan sidii loo xaqiijin lahaa badbaadada dhabta ah ee qaxootigu ay u baahan yihiin.

Ciidanka badda Yemen, waxay ilaaliyaan dhammaan xudduudaha biyaha ee dalka oo dhan, iyagoo xoojinaya ilaalada xeebaha (kuwaas oo ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha). Waxay kaloo ilaaladda xeebuhu u xilsaaran yihiin dammaanad gaar ah oo la xiriirta badbaada badda. Bishii February 2005,waxay dawladda Yemen heshiis dhinaca ammaanka la saxiixatay dalka France, kaas oo ku saabsanaa tabbabaro loo fidinayey waaxyaha Yemen, is-waydaarsiga xogta

sirdoonka iyo la socoshada dhaqdhaqaaqa Gacanka Bab al-Mandab. Sidoo kale, waxaa bishii October 2007 ilaalada xeebaha Yemen iyo ciidamada is-bahaysiga, kuwaas oo hadafkoodu ahaa si loo soo qaban lahaa dadka tahriibka ka ganacsada, kaddib marka ay xeebaha ku dejiyaan rakaabka. Dhanka kale, ciidammada badda Maraykanka, aya gacan ka siiya ilaalinta gacanka Bab al-Mandab oo ay ka hawlgalaan ilaa 1,100 xubnood ee ciidammada isku-dhafan ee Geeska Afrika. Waxaana ku soo biiray ciidammada Jarmalka iyo talyaaniga dadaalka lagu xakamaynayo tahriibka gobolka ka jira. Sidoo kale dalka Ingriiska iyo Maraykanka, ayaa dhawaan tababbarro la xiriiray xeryaha soo dhaweynta, sharciga qaxootiga u fidiyey ilaaladda xeebaha Yemen iyo hay"adda UNHCR kaas oo ay ka qayb qaateen 120 qof oo samata-bixinta badaha ka tirsan oo ay ka mid ahaayeen 40 saraakiil sar sare oo ciidammada ah. Waxay kaloo dawladda Yemen qaaday tallaabooyin dheeraad ah oo ay ku ilaalinayso xeebaheeda. Sannadkii 2007, kaddib markii tahriibku ay ka cabsadeen in la ogaado, ayey is-bddel ku sameeyeen toobiyaha ay maraan kuwaas oo bilaabay inay ku daadiyaan xeebaha fog, taas oo sii adkaysay diiwaangelinta iyo taageerada soo galootiga cusub.

### 2.4 Wixii Yemen ka dambeeya – Saudi Arabia iyo waddammada Gacanka

Waxaa soo jiitay waddammada hodanka ah ee Gacanka malaayiin shaqaalaha qaxooti, kuwaas oo bartilmaameed ay higsanayaan uu gobolka u noqday,iyagoo fursado shaqo ah ka raadsanaya. Hase yeeshee, marka la eego oolka Joqraafiyeed oo u dhaw waddammada koofur-galbeed Asiya,bariga Dhexe iyo Geeska Afrika, ayaa ku dhiirrigeliyey qaxooti fara badan inay magangalyo u raadsadaan gobolladan iyaga ah, iyadoo ay u weheliyaan badbaado iyo fursado wacan oo dhaqaale. Labadan arrimood ee dhaqaalaha iyo oolka Joqraafi, ayaa u horseeday in waddammada Khaliijku ay dhaqan-geliyaan siyaasado lagu xakamaynayo qaxootiga. Sidaas awgeedna, waxaa imminka lagu qiyaasaa dadka soo galay Khaliijka ilaa 10 milyan oo qof. Tiradan iyada sidaa aan xusnay qaar waa qaxooti. Waxay u muuqdaan qaxooti dhaqaale, waxay heli karaan ruqsado shaqo oo ay ka hawlgalaan, taas oo ku xirnaan doonta hadba muddada dalkaasi u oggolaado iyo xeerarka dhinaca socdaalka.

Magan-gelyo doonka Soomaalida ee la soo xiriira UNHCR intooda badan ee Gobolka Khaliijka, waxay hoos tagaan hab-raacyadan: (1) Qaxootiga dhaqaalaha ee iyagu ku noolaa gobolka khaliijka muddo aad u dheer, (2) kuwa ku soo galay khaliijka dal-ku-gal muddo gaaban ah (dalxiis, booqasho qoys, xajj) oo ikaga nagaaday in muddo kaddib markii dal-ku-galku ka dhacay iyo (3) kuwa iskood iskaga socda sida, shakhsiyaad markii hore Yemen ka so galay,kaddibna hore u sii galay Khaliijka iyagoon haysan waraaqo sharci ah.

Magan-gelyo doonka Soomaalida ah ee Khaliijka, waxay isugu jiraan kuwa si sharci-darro ah dalkaas ku soo galay ama sharciba ku soo galay (tusaale, ruqsad degenaansho) balse ay sababo jira awgeed fursadaasi ku waayey (tusaale, muddadii heshiiskii shaqada oo ka dhacay).marka la eego qawaaniinta guud iyo hawlgallada maalinlaha ah, magangalyo doonka Soomaalida ama kuwa kaleba waxay fursad u helaan UNHCR waddammada khaliijka. Waddammada khaliijku bartilmaameed kama dhigtaan Magan-galyo doonka. Marka la eego siyaasadda waddammada khaliijka, qaxootiga sharci-darrida ku soo gala, waxa la wafajiyaa nidaam waafaqsan hannaanka socdaalka ka hor inta uusan u gudbin hay'adda UNHCR. Kuwa badbaada u baahan, waxa go'aan ka gaaraya UNHCR xitaa haddii ay sharci-darro dalka ku joogaan.

Marka la eego xaaladda ka sii daraysa ee Somaaliya meelaha qaarkood, xafiiska UNHCR ee Saudi Arabia ayaa sii kordhiyey talo-bixinta uu u soo jeedinayo hay'adaha dhiggiisa ah ee gobolka, sida loogu baahan yahay heer lagula dhaqmo Soomaalida, iyadoo la tixgelinayo is-beddellada waaweyn ee imminka ka dhacaya dalkooda iyadoo sidoo kale, faahfaahin laga bixinayo qaab-hawleed waafaqsan badbaadada caalamiga ah ee marxaladdan iyadan ah loo eegayo koox gaar ah iyo waqti gaar ah. Waxayna UNHCR u ololaynaysaa sidii ay ugu tirtirsiin lahayd dawlaha hoose u xaqiijiyaan oggolaansho ay ku sii nagaadaan waddammada ku habboon, badbaadada ka dhanka ah masaafuriska iyo fursadaha xuquuqda dhaqaale-bulsheedka ee loo dammaanad qaado dadka ajnabiga ah (waxbarashada,daryeelka caafimaadka, hoyga, furasadaha gargaarka ama shaqaalaynta) iyo sidoo kale inaan xoog lagu kala masaafurin xubnaha isku qoyska si ay u wada noolaadaan.

**2.5 Xeer-dhaqameedka Badbaadada Soomaaliya**

Soomaliya iyo ilaa xad dalka Yemen, waxay leeyihiin xeer qaab-dhimeed ay kaalin lixaad leh ka qaataan oday dhaqameedyada, kuwas oo si xeel-dheer u meel-mariya badbaadada muwaadiniinta ee dhinaca qabiilka ku dhisan. Oday dhaqameedka Soomaaliya, ayaa kaalin wax ku-ool ah ka qaata xallinta dhibaatooyinka jira madaama aysan dalka ka jirin dawlad dhexe oo si buuxda u shaqaysa.

Xeer Soomaliga (Customary laws) waa heshiis aan qornayn oo qaab oraah ah uu jiilba jiil ugu soo gudbiyey. Waxayna muhiimmaddiisu ku dhisan tahay hawl-maalmeedka dhacdooyinka qabaa'ilka, iyadoo xeerku oo xal u raadiyo xiriirka beelaha dhexmara, sida; guurka, colaadda iyo sida loola dhaqmo dadka ajnabiga ah, shuruucda isticmaalka khayraaraadka, iyo mag-dhawga dambiyada uu mid ka mid ah qabiilku u gaysto mid kale. Wuxuu Xeerku dusha ka saaraya dhamman xubnaha beesha mas'uuliyad midaysan, kaas oo ay wada qaadanayaan mid ama wixii ka badan dhibta ay gaystaan. Haddii aan magta la bixin, kaddib qabiilka lagu xad-gudbay waxay xaq u leeyihiin inay dambiilaha dilaan ama xubin ka mid ah qabiilkaas isaga ah. Tani waxay sii hurisay colaad iyo dhiig ka dhex daata labada beelood, ilaa ay odayadu heshiis ka gaaraan, iyadoo ay suuragal tahay in mag dheeraad ah la bixiyo.

Marka si guud la isku bar-bar dhigo qaabka xeerka hoggaamiyaasha beelaha iyo hay'adaha maamulka Puntland –waxaa lagu qiyaasay in 90% - khilaafaadka dhacay iyo fal-dambiyeedka lagu xalliyo Xeerka kaas oo loo marayo qaab ka baxsan nidaamka garsoorka rasmig ah. Halkii ay ka ahayd in Boolisku soo qabto eedaysanaha, dabadeed uu eedaysanuhu bixiyo kharajyada muddada la hayey. Waxa inta badan lagu xalliyaa khilaafaadka qaab wada xaajood ah oo dhexmara labada geesood, iyadoo ay fulinayaan oday dhaqameedyadooda, dacwadduna ma gaarayso maxkamadda. Tani waxay caqab ku noqonaysaa dadka aan lahayn oday dhameedyo matala, si ay badbaado rasmi ah ugu helaan Xeerka, ama aysan cabsi ka qabin in xoog loo adeegsado maadaama ay helayaan taageerada beesha – tuaasle, qabaa'ilka yar yar ee Soomalida iyo ajnabiga.

Waxaana labadan caqabad ku ah awoodda xeerku matalayo – marka la eego qabaa'ilka yar yar ee Soomalida iyo inta badan ajnabiga, waa ay ka baxsan yihiin badbaadadiisa, sidaas darteedna waa lagu xad-gudbi karaa – iyadoo tallaabada xigta ay suuragal tahay inay badbaado helaan haddii ay tageeraan oday dhaqameedku in la ballaariyo baaxadda xeerka ee ay kooxahaasi

badbaado ku heli karaan. Sannadkii 2006, oday-dhaqameedka Somaliland, ayaa is-beddel ku sameeyey xeerka iyagoo u eegaya heerka xuquuqul insaanka caalamiga ah iyo shareecada islaamkaba, waxaana hab-raacyadaas u sahlay Golaha Qoxootiga Danish-ka (DRC). Waxay odayadu dib-u-xaqiijyeen xuquuqda dadka laga badan yahay , haweenka, carruurta iyo ajnabiga, iyagoo saxiixay baaq arrintan khuseeya, waxaana simminaaro lagu qabtay Somaliland oo dhan si ay deegaannnadooda ugu wacyi-geliyaan is-beddelka la sameeyey. Hase yeeshee, in Somaliland iyo Puntland ay tallaabooyin wax ku ool ah ka qaadaan xuquuqda qaxootiga iyo ajnabiga, ayaa weli u muuqata mid dhalanteed ah.

## WAAXDA III: GURMADKA

### 1. Dulmarka guud ee waxqabadka fulay ama imminka la doonayo in wax laga qabto.

Gurmadka la xiriira badbaadada iyo bini'aadminnimda ee ay u baahan yihiin shakhsiyaadka tahriibka isku-dhafan ee Soomaliya ka gudbaya awgeed, ayaa waxaa si gaar ah uga hawlgalaya guddiga joogtada ah ee hay'adaha wadajirku (IASC), kuwaas oo waxqabadkooda ku salaynaya kooxaynta badbaadada ayna ka mid yihiin: xoojinta awoodda badbaadada heer qaran, hawlgallada u ololaynta wadajirka ah, barnaamijyada xuquuqda ku salaysan iyo farsamooyinka looga hortagayo caqabadaha jira iyadoo la xoojinayo barnaamijyada waaxyaha isku-dhafan, islamarkaana sare loo qaadayo wacyi-gelinta iyo isku-duwidda hawlaha lagu xoojinayo xiriirka gudaha.

Marka la eego xaaladda nabadgalyada Puntland ee bartamihii -2007, waxay ahayd mid xasiloon, iyadoo kooxda maaraynta amaanka QM, ay soo jeedisay in hoos loo dhigo wejiga ammaanka ilaa marxaladda 3aadna la gaarsiiyo, balse xaaladda bini'aadminnimada ayaa sii xumaatay Disember 2007. Qaraxyada Bomka aan kor ku soo sheegnay ee Bossaso oo ay weheliyaan afduub saxafiyiin iyo shaqaalaha gargaarka (oo ay ka mid ahaayeen dadaal toos ah oo ay shaqaalaha gargaarku uga qaybgalayeen gurmadka tahriibka isku-dhafan) oo ay inta badan horseed ka ahaayen hay'adaha caalamiga ah si ay u yareeyaan ama ay shaqaalahooda ugala soo baxaan. Xaaladduna way ka sii daraysay, iyadoo xitaa weerarro hubaysan lagu qaaday shaqaalaha UNHCR ee Garoowe, 5 April 2008 taas oo sababtay in xaladda ammaanka gaarto ilaa marxaladda 4aad. Waxaa intaas dheer khilaafka u dhexeeya Somaliland iyo Puntland ee ka dhalatay muranka xudduudahaee gobollda Sool iyo Sanaag , taas oo hoos u dhigtay dhaqadhaqaaqii tahriibka ee sii mari jiray Bossaso iyo Djibouti islamraaka caqab ku noqday gargarka dhinaca bini'aadminnimda ee goobahaas iyaga ah marayey. Waxay Puntland taageero maaliyadeed iyo ciidanba u fidisaa DFKMG ah ee bartamaha iyo Koofurta Soomaliya, iyadoo ay sii kordhayaan weerarrada kooxaha islaamiyiinta ah ee ka dhanka ah Puntland, waxana laga walaacsan yahay xaaladda ammaanka mustaqbalka Puntland oo an degenayn, lamana saadaalin Karin. Dhanka kale, awoodd dhinaca nabadgalyada ee ay Puntland ay ku dammaanad qaadi karto shaqaalaha samafalka, ayaa ah mid aad u xaddidan.

Xiisadaha dhinaca bini'aadminnimada ee ka sii daraya ee imminka ka taagan bartamaha iyo koofurta Soomaliya iyadoo ay ku bara kaceen in ka badan 700,000 qof magalaada Muqdishu sannadkii 2007,taas oo culays lixaad leh ku noqotay maaliyada hay'adaha iyo awoodda hawlwadeennnada. Mana jiraan dhaqaale ku filan amashaqaale dabooli kara baahida dadka

tabaalaysan ee ku bara-kacay Soomaaliya, haddii aan la helin dammanad buuxda oo ay hay'aduhu wax uga qaban karaan tahriibka isku-dhafan, waxay xaaladdu noqon doontaa mid cakiran, gaar ahaanna,xaaladda dhinaca ammaanka ee ka sii daraysa ee Puntland.

### 1.1. Fursadaha Adeegyada Asaasiga ah

Laga soo bilaabo min 2006 ilaa imminka, waxa la calaamadeeyey tirade sii kordhaysa ee tahriibka isku-dhafan iyo qoxootiga Bossaso. Walow ay arrintani jirto, haddana waxaa xaddidan adeegyada wax looga qaban karo tirada sii kordhaysa. Inkastoo deg-deg loo hirgeliyey xarunta soo dhaweynta iyo ku-ha-kashada si loo dejiyo Ethioipian-ka halista ugu jiray in la masaafuriyey, markii ay dawladdu ololaha ku qaaday 2006,mana ahayn wax loogu talo galay si joogto ah. Xitaa haddii ay ahaan lahayd, waxaa soo if-baxay dhibaatooyin fara badan oo aan hore loo ogayn kaddib markii xerada la furay, taas oo horseedi lahayd in ndhammaantteedba la xiro. Gaar ahaan, waxa la ogaaday in xarunta loo is-ticmaali jiray goob lagu carbiyo tahriibayaasha oo laga yaabo inay ku lug lahaayeen saraakiil sar sare oo hay'adaha xoojinta ammaanka. Sannadkii 2007, wuxuu maamulka Puntalnd codsaday in loo dhiso xarun ku-ha-kasho kale taas oo la diiday, maadama waaya-aragnimo laga helay sannadkii 2006, inay xarunta caynkaas ahi ay dammanad qaadi karto dhinaca badbaadad waa mid weli la xaqiijinayo oo ay su'aasheedu taagan tahay.waxay UNICEF daawooyin u qaybisaa rugah caafimaadka Bossaso, walow tiro ka mid ah tahriibayasha qaxootiga ah ay ka cabanayaan inaysan fursad u helin adeegyadaas.

### 1.2 Caddaynta iyo Badbaadada Qaxootiga

Waxay UNHCR Hargaysa ku leedahay waaxda awoodaynta xaaladaha qaxootiga (RSD),taas oo ah mashruuc u ha hawlgala Hargaysa, Somaliland iyo Garoowe oo Punland ah, wuxuuna gacan ka gaystaa badbaadada magangalyo-doonka iyo qaxootiga. Wuxuu mashruuca( RSD) garoowe ka wadaa hawlo awoodaynta shaqaalaha oo la higeliyey 2007 si sare ugu qaado waxqabadk hawl-xifadewedka. Iheshiis dhexmaray UNHCR Golaga Arrimaha qaxootiga (RAC) ee wasaaradda Arrimaha Gudaha puntland dhammaadkii 2006, iyadooo RAC uu ka hawlgay diiwaan-gelinta iyo dukumenti u samaynta magan-galyo doonka, halka UNHCR ay oggolaatay meel-marinta xuquuqda qaxootiga dhabta ah. Xaladda hawlaha Garoowe ayaa su'aalo la iska weydiinayaa sidaan horeba u xusnay weerarkii lagu qaaday 5tii April 2008.

Dhinaca Somaliland, bishii Maarso 2006, waxay waaxda xaqiijinta xaaladda qaxootinnimada(REC) ee wasaaradda arrimaha gudaha ay hakisay diiwaangelintii magan-gelyo doonka, kaddib markii amar ka soo maxay madaxweynaha oo la xiriiray in baaritaan lkagu sameeyo codsiyada magan-gelyo doonka gaar ahaan ka soo jeeda dhulka jooggiisu sarreeye ee Ethiopia. Hase yeeshee, wada xaajood in muddo ah socday kaddib, waxay wasaaraddu magacawday xubno cusub oo golaha REC ah bishii October 2006, kaas oo markii ugu horreysay labo xubno haween ah lagu soo daray. Ilaa dhammaadkii 2007, REC ma bilaabin diiwaangelintii, waayo UNHCR ayaan meel-marin tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee laga doonayo inay REC ku hawlgalaan. Hase yeshee, waxaa la isla meel dhigay qaab-hawleedka diiwaangelinta, gudbinta iyo gurmadka la xiiira labadaraadle, kooxaha tabalaysan.

Qaxootiga ay hay'adda UNHCR ku aqoonsato gudaha Soomaaliya, waxa la siinayaa dammaadda qaxootinnimada. Waxayna xaq u yeelan doonaan adeegyada caafimaadka, iyo waxbarashada, iyadoo xubnaha kooxaha taagta darranna lagu taageerayo gunnooyin u gaar ah.

Xalka kama dambaysta ah ee qaxootiga ku sugan Puntland iyo Somaliland waa mid xaddidan, kaas oo inta badan loo fidiyo dib-u-dejin waddan seddexaad, iyadoo mararka qaarkoodna ay jiraan dadka tabaruc ahan dib loogu celiyo waddammadii ay u dhasheen. Sannadkii 2007, 32 qoys oo ka koobanaa (91 iqof) ayaa dib-u-dejin uga dhoofay Somaliland, kuwas oo intooda badan la geeyey Canada, halka 92 qoys oo ka koobnaa (252 qof) loo gudbiyey in tixgelin la siiyo. Marka la eego maamulka Puntland, waxa la door-biday in la xoojiyo isku-fillaanshaha dhaqalaha,kuwaas oo loo qoondeeyey 2008 iyo wixii ka dambeeya.

### 1.3 Ka hortagga Fara-xumaynta iyo Xad-gudubyada Dheddig-laboodka

Waxaa sii kordhaya xad-gudubyada dheddig-laboodka oo ay kamid yihiin dadka bara-kacay. Marka la eego waxqabadka kooxaynta badbaadada ee guddiga joogtada ah(IASC), waxay muujinayaan kooxaha ku hawlan xad-gudubyada ka dhanka ah dheddig-laboodka ee ka hawlgala Nairobi iyo gudahaba inay aad u sii kordhayaan xad-gufdubyaas , iyadoon loo helin gurmadkii ku habboonaa magaalooyinka Galkayo, Bossaso, Baidoa iyo Garowe. Khariidada xad-gudubyada dheddig-laboodka ee gobollada lagu bara-kacay ee Soomaliya, waxa imminka ka bilowday badbaado iyo la socosho la xiriirta hindisaha dhaqdhaqaaqa(eeg waaxda hoose ee ugu soo horreysa). Tani waxay noo saamaxaysaa goobaha ay dhacdooyinka xad-gudubyada dheddig-laboodka ugu sarreeyaa ay ka dheceen si mudnaanta gurdamka bartilmaameed looga dhigto.

### 1.4 Badbaadada iyo la socoshada Dhaqdhaqaaqa Dadka

Waxa la hirgeliyey qaabab kala duwan oo lagula soconayo xad-gudubyada ka dhanka ah xuquuqul insaanka lidka ku ah qaxootiga iyo dadka kale ee gudaha Soomaaliya ku bara-kacay. Waxaana ka mid ah hab-raaca la soccoshada dhaqdhaqaaqa dadka (PMT) waana hindise lagula soconayo bara-kaca ay sababeen daadadka, abaaraha iyo ka gudbitaanka xadka. Iyadoo loo marayo in ka badan 20 shabakadaha hay'adaha NOG-yada maxalliga ah, waxay waaxda la socoshada dadku(PMT),ayaa digniin la xiriirta qaab-hawleedka hore u soo saartay iyo daraasad toddobaadle ah oo qaababka bara-kaca tilmaamaysa, taas oo xogta lagu gaarsiinayo dhagaystayaal fara badan, oo loo adeegsanayo warbaahinta caalamig ah iyo midda maxalliga ahba. Wuxuu hab-raacani dhammaystirayaa waxqabadka la socoshada badbaada oo ay iska kaashadeen UNICEF, UNHCR, Oxfam Novib iyo NRC, mar labaad iyadoo la adeegsanayo shabakadaha maxalliga ee dalka oo dhan, ayaa waxaa la diiwaangelinayaa iyo u ololayn loo samaynayaa xad-gudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadamiga ee soomaaliya. Waxaa kaloo la adeegsanayaa noocyo farsamo oo kala duwan oo lagula soconayo dhibaatooyinka hortagan qaxootiga Bossaso, kuwaas oo lagala xiriirayo hay'adaha isku-duwidda caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ahba, iyadoo Waaxda la socoshada dadka(PMT) ay sii ballaarin doonto waxqabadka ku wejahan qaxootiga.

### 1.5 Xirfadaha Warbaahinta

Waxaa lagu horumariyey istaratiijiyada u ololaynta oo ay ka mid yihiin; idaacadaha iyo farriimaha qoraalka ah ee bug-yaraha ee halista tahriibka looga digayo qaxootiga u sii gudbaya ilaa Yemen ee sii maraya Bossaso iyadoo talooyin dhinaca badbaadda ahna loogu jeedinayo Puntland gudaheeda. Waxaana ololaha Agabka iyo xogta wargelinta loogu soo bandhigayaau luuqado kala duwan si ay qaxootiga isku-dhafan uga kororsadaan macluumaad, kuwaas oo tijaabo ahaan lagu bilaabayo Muqdishu iyo Bossaso. Waxaa iyana taageertay barnaanjiyo laga

sii daayey idaacadaha, wargaysyada iyo TV-ga Ethiopia. Waxana istraatiijiyada ka mid ah dadaalka wadajirka ah ee u ololaynta heer qaran, maamuullada heer gobol, oday dhaqameedka iyo hay'adaha kale, si loo xoojiyo xakamaynta qaxootiga isku-dhafan iyo dhibaatooyinka ay la kulmaan. Ololahan ayaa mar hore wuxuu ku tallaabsaday horumar, maadama qaar ka mid ah qaxootigii gaaray Yemen ee jabuuti ka soo galay ay sheegeen inay wax badan ka kororsadeen markii ay dhagaysteen dhibaatooyinka lagala kulmay halista dhinaca Bossaso. Waxaana loo baahan yahay dadaal weyn oo isku xiran oo ololahaas lagu xoojinayo sida; goobta asalka ah ee ay ka imaanayaan oo ay weheliyaan goobaha ay ka amba-baxayaan iyo weliba farriimo horumarsan oo laga baahiyo goobaha ay ka sii gudayaan.

### 1.6 Taageeridda Dib-u-noqoshada Tabaruca ah (“AVR”)

Si ay ugu gurmato tahriibka sii kordhaya eek u xayirmay iyo magan-gelyo doonka la diiday ee Bossaso, waxy IOM u hawlgashaly labo hawlood oo kala duwan oo lagu taageerayo Dib-u-noqoshada tabaruca ah(AVR) sannadkii 2006-da iyo mid sannadkan 2008da. Tiro ka mid ah dadkii ka faa'iidaystay dib-u-celintii koowaad ayaa isku dayey inay mar labaad ku biiraan kooxda cusub. Si markaas loo xaddido in dadku ku noq-noqonaya, waxaa la soo jeediyey in AVR-ka loo soo jeediyo dadka tabaalaysan ee xayirmay, iyo kuwa loo oggolaan waayey magan-gelyada, islamarkaana hawlahooda la bilaabo xilliga horraanta sannadka ee ku beegan ilaa Maarso/April.

## 2. Istratiijiyada la soo jeediyey

Sida tilmaamayso daraasaddii dhawaan ay soo saartay (MMTF)dhacdada tahribka isku-dhafan ee loogu gudbayo Gacanka cad-meed, iyadoo loo sii marayo Bossaso, ayaa waxaa la soo jeediyey dhawr qodob oo la doonayo in lagu tallaabsado hab-raacyada gurmadka oo leh istraatiijida hufan oo isugu jirta marxald gaaban iyo mid fog. Waxayna kooxda hawlgalka( MMTF) diiradda saaraysaa iskaashi buuxa oo dhexmara waddamada gobolka oo lagu xaqiijinayo meel-marinta talo-soo-jeedintaas, islamarkaana la waafajinayo shaxda UNHCR eeqorshaha 10-ka dhibcood ka kooba. Waxaanashaxda istraatiijiyada Soomaaliya (Puntland iyo Somaliland ) lagu kordhin doonaa daraasdaha iyo doodaha shirka magaalada Sanca, Yemen ka dhici doona ee lagu soo qaadi doono xaaladda tahriibka isku-dhaafan.

Labada istraatiijiyadood ee mudnaanta koowaad u leh dulmarka guud ee waxqabadka faafaahsan ee ay soo bandhigeen Kooxda hawlgalka(MMTF) ee shaxda istraatiiiyada Soomaaliya:

### 2.1 Horumarinta iskaashiga gobolka, daraasado iyo xiriir dhexmara hay'adaha heer gobol

Waxqabadka kooxda hawlgalka(MMTF) waxaa ka mid ah dasaadda dhawaan, oo muhiimad gaar ah u leh in diiradda la saaro xaaladda gudaha Soomaaliya. Sida hore loogu xusay waaxyaha qoraallada aynu soo tilmaannay waxaa jira farqi lixaad leh oo u dhexeeya culaysyada gobollada kaas oo uu ka mid yahay toobiyaha isku xidha Bossaso iyo khadadka kale ee tahriibka, gaar ahaa DJabouti, kaas oo aan marag ka nahay inuu weli jiro ama uu dib-usoo-cusboonaaday dhaqdhaqaaqiisii. Sida ka muuqata hay'adaha ka shaqaynaya waddammada kala duwan ee Ethiopia, Djibouti iyo Yemen iyo sidoo kale xarumaha ku-ha-

kashada/barta safarka ugu dambaysa waddamada ku yaal, ayaa waxaa tixgelin mudanin xog dheeraad ah loo baahan yahay,ayna lagamamaarmaan tahay in la isu geeyo xogta gurmadka heer gobol, si loo mideeyo.

Intaas waxaa dheer, iyadooaysan jirin kulammo heer goboll ah oo si gaar ah loogu soo bandhigo tahriibka isku-dhafan ee Gacanka Cad-meed u gudbaya. Waa dhab in loo baahan yahay doodo ay ka wada qaybgalaan mas'uuliyiinta Waddammada asal ahaan ay ka soo jeedaan, xarumaha ku-ha-kashada/ ama barta uu safarku ku eg-yahay iyo goloyaasha heer gobol sida IGAD iyo AU, inay wadajir ahaan uga qaybgalaan wada hadallo joogto ah oo ay ka mid yihiin jaangoynta siyaasad hufan iyo mawqif midaysan oo arrintan waafaqsan. Mid ka mid ah farsamooyinka muhiimka ah, ayaa waxay noqon kartaa hab-raaca wada-tashiga heer Gobol( (RCP), taas oo lagu soo qaadi karaa shirweynaha Addis Ababa ee waddamada gobolku ay kaga doodayaan maaraynta qaxootiga iyo tahriibka isku-dhafan,kaas oo ay wadajir ahaan u martigeliyeen IOM, IGAD iyo AU. Waxaa kaloo jira dhawr kulan oo kale oo heer gobol iyo heer caalami ah oo uu ka mid yahay kulanka Sanca, shirkii heer wasiirrada ahaa ee ku saabsanaa wada tashiga shaqaalaha muddada gaaban(oo ka furmay Abu Dhabi January 2008) iyo kulanka EU-Africa, oo looga faa'iidaysan karo farsamooyinka imminka jira. Marka la joogteeyo kulamada wax ku-oolka ah ee heer gobol,ayaa waxaa awood loo heli karaa in la soo bandhigo sababta asalka u ah tahriibka isku-dhafan, maadaama qaar badan oo ka mid ah daraasadaha la soo jeediyey aysan ku habboonayn istraatiijiyada gurmadka loo baahan yahay.

**2.2 Horumarinta iskaashiga Soomaaliya gudaheeda iyadoo la abuurayo waxqabad marxaladda dhexe iyo marxaladda fog**

Ilaa l 2007, gurmadkii la xiriiray tahriibka isku dhafan ee Soomaaliya, ayaa ahaa kuwa aan hore looga sii fekerin, iyadoo samafalka dhinaca bini'aadminnimadu ay ku mashquuleen xilliga ay ugu badan ee ay gudbayaan inta u dhaxaysa August iyo April. Maalgelinta hay'adaha deeqda bixiya iyo hawlgallada la xiriira oo dhami waxay ahaayeen kuwa marxalad gaaban ku wejahan, muhiim ma ahan in xoogga la saaro caqabadaha ugu waaweyn ee jira, sida lagu qeexay waaxda II ee kor ku xusan. Qaar gurmadka ka mid ahaa ayaa loo sii mariyey mashaariicda sida;RSD iyo kooxaha xuquuqda u ololeeya, balse waxa loo baahan yahay in si hufan loo agaasimo, iyadoo loo baahan in la socosho lagu sameeyo. Waxay kooxda hawlgalka(MMTF) si habboon u maaraysay isku-duwidda u dhaxaysay hay'adaha ay khusayso sannadkii 2007 welina waa gole fadhigiisu yahay Nairobi, kaasoo aan ku habboonayn xaqiijinta farqiga loo baahan yahay ee hawl fuliyayaasha dhammaan gobolka oo dhan. Farsamada isku-duwiddu, waa inay ka hawlgashaa gudaha Soomaaliya, inta badan waxaa xusid mudan waxqabadka (IASC )kooxaynta badbaadada, kuwaas oo ay xoojiyaan islamarkaana awoodayn ku habboon u fidiyaan khubaro waaya-arag ah, taasina waxay isku-xiraysaa xog is-waydaarsiga u dhexeeya iyaga iyo dhammaan shabakadaha isku-dhafan ee gobolka oo dhan.